



BUUGA DARAWALKA
QIIMAYNTA SHARCIYADA BAABUURTA



 **Bureau of
Motor Vehicles**

BMV.OHIO.GOV



XOG KU SAABSAN BUUG TUSMEEDKAAN

Ohio Bureau of Motor Vehicles (BMV) waxay kormeertaa ruqsad siinta iyo diiwaan gelinta darawalka iyo gaariyaasha matoorka ku shaqeeya iyo adeegyo kale. Waxaan ku dedaalnaa in aan ka dhigno khibrada aad kala kulanto BMV mid aad ku qanacdo oo waxtar leh.

BMV waxay bixisaa Buug Tusmeedka Darawalka ee Ohio oo ah tasmada waxbarashada ee dadka u baahan Ruqsadda Darawalka ee Ohio, oo uu qasab ka dhigaayo sharcigu si aad gaari matoor ku shaqeeya ugu wado gudaha Ohio, waxayna dejisaa tusmo ku aadan sharciyada gaariyaasha matoorka ku shaqeeya. Buug tusmeedkaan keliya waxaa laga yaabaa in uusan wada dabooli karin dhammaan sharciyada gaariyaasha matoorka ku shaqeeya quseeya.

Buug Tusmeedka Darawalka ee Ohio wuxuu sharxayaa hanaanka guud ee qaadashada Ruqsadda Darawalka wuxuuna xog kooban ka bixinayaa sharciyada iyo farsamooyinka gaari wadista badbaadada leh. Buug tusmeedku badel uma ahan, kamana awood badan karo, Xeerka La Cusbooneysiya ee Ohio ama Heerka Maamulka ee Ohio. Macluumaadka lagu baxsho buug tusmeedkaan way isbadeli kartaa.

Adeegso lifaaqyada lagu baxsho dhammaan buug tusmeedkaan si aad u hesho khayraad dheeraad ah.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada BMV, booqo mareegta BMV oo ah www.bmv.ohio.gov.

ADEEGYADA MBV EE OONLAYNKA AH

- Mar imtaxaanka aqoonta
- Mudeyso imtaxaanka gaari wadista
- Difaaco Booskaaga safka Ku Xigeenka Diiwaan Hayaha Wakaallada Ruqsadda
- Cusbooneysiima ama dib u daabac Ruqsadaada Darawalka ee Ohio ama Kaarka Aqoonsiga*

**Qarash ayaa lagaa qaadayaa*



MAWDUUCYADA

QAYBTA 1: SIDA LOO HELO RUQSADAADA DARAWALKA

Baaritaanka Aragga iyo Imtaxaanka Aqoonta.....	1
Kaarka Aqoonsiga Ogolaanshaha Casharka	
Ku Meel Gaarka ah (TIPIIC).....	2
shuruudaha waxbarashada ee darawalka (Dadka ka Yar 21 sano).....	3
shuruudaha waxbarashada ee darawalka (Dadka haysta Daganaanshaha ku Meel gaarka ah ee da'da 21 iyo ka wayn).....	3
Mootooyinka Ohio.....	3

QAYBTA 2: KAHOR INTA AADAN GAARI WADIN

Kormeerka Gaarigaaga.....	4
Booska Darawalka: Wax ka Badelka Kursiga iyo Muraayada.....	5
Xanibaadaha Badqabka.....	6

QAYBTA 3: FEEJIGNOOW

Araga.....	7
Daal.....	7
Gaari Wadista Daran.....	7
Ka mashquulida Baabuur Wadista.....	7
Khamrada, Daroogada, iyo Gaari Wadist.....	8

QAYBTA 4: XEERARKA WADADA

Xadidaada Xawaaraha.....	9
Xaqa Wadada.....	10
Tilmaamaha Wadooyinka.....	10
Calaamadaha Wadooyinka.....	11
Calaamadinta Seedka geeska Wadada.....	13
Seedka Wadada Labada Seed ee Bidix Keliya Loo Leexan karo.....	14
Meelaha Wadada laga Gooyo.....	14

QAYBTA 5: BARASHADA SIDA GAARIGA LOO WADO

Kicinta Matoorka.....	15
Dhaqaajinta Gaariga.....	15
Joojinta Gaariga.....	15
Isteerinka.....	16
Reefis u Bixidda.....	16
Kala Goysyada iyo Leexashada.....	16
Afar Irdoodiyada ama Isgoysyada Wadada.....	18
Ku Socodka Seedka.....	18
Badelidda Seedadka.....	19
Gelista Wadada Wayn ee Seedadka Badan.....	19
Ka bixidda Wadada.....	19
Baasidda gaari kale.....	20
Isgoyska Wadada Tareenka.....	21
Ka Istaagidda Baska Dugsiga.....	22
Baarkinka.....	23

QAYBTA 6: SHARCIYADA IYO GANAAXYADA GOBALKA

Caymiska - Masuuliyadda Dhaqaalaha.....	24
Khamrada, Daroogada, iyo Gaari Wadista.....	24
Ganaaxyada.....	26

Iska Laadlaadinta dhinaca Gaadhiga.....	27
Sharciyada Suumanka/Badqabka Rakaabka	
Ilmaha ah.....	27

QAYBTA 7: XAALADAHA GAARI WADISTA GAARKA AH

Isbaarooyinka Booliiska iyo Joogsiyada Wadada.....	28
Marka aad Isticmaalayso Nalalka Fareejada.....	28
Wadista baabuurka Habeenkii.....	28
Wadista baabuurka Xiliga Ciiryaamada.....	29
Wadista baabuurka xiliga Qaboobaha.....	29
Aagaga Shaqada.....	29

QAYBTA 8: TILMAAMAHA GAARI WADISTA BADQABKA LEH

Raadinta Muuqaalka ah.....	30
Maareynta Xawaaraha.....	30
Maareynta Goobta.....	31
Isgaarsiinta.....	32
Kahortaga Dhaawaca ka dhasha Gawaarida Kulul.....	33

QAYBTA 9: WADAAGISTA WADADA

Dadka wadada Lugaynaya.....	34
Wadeyaasha mootada.....	34
Wadeyaasha baaskiilka.....	35
Gaariyaasha Ganacsiga.....	36
Gaariyaasa Gurmada Degdega ah-(Gaariyaasa Booliiska, Dab Damiska, Caafimaadka).....	38
Sharciyada Dulmarka.....	38
Gaariyaasha Gaabiska ku Socda.....	38

QAYBTA 10: XAALADAHA DEGDEGA AH

Iska Ilaalinta Isku Dhacyada.....	39
Ciladaha Gaariga.....	40
Marka Gaariyaashu isku Dhacaan.....	41

QAYBTA 11: QAADASHADA IMTAXAANKA GAARI WADISTA

Tijaabada Xirfadaha maareynta gaariga iyo ku Wadista Wadada.....	42
Koorsada Tababarka Darawalka Qofka wayn ah ee Laoo Gaabiyay.....	44

QAYBTA 12: IIBSASHADA RUQSADAADA DARAWALKA

Iibsashada Ruqsadaada Darawalka.....	45
Dib u cusboonaysiinta Ruqsadaada Darawalka.....	47
Casharada Ruqsadda Darawalka.....	47

QAYBTA 13: MAXAA KALE OO AY TAHAY INAAN OGAADO?

Dadka Ku Cusub Ohio.....	50
Sanduuqa Save Our Sight.....	50
Diiwaanka Ku Deeqaha Xubinta Jirka/Second Chance Trust Fund.....	50
Diiwaan Gelinta Codbixiyaha.....	50
ID R Kids.....	50
Macluumaadka Xiriirka ee Ehelka kuugu dhow – ee Xaalada Degdega ah.....	51
Diyaarinta Dardaaranka Dhaxalka Qofka nool.....	51
Aqoonsiga Ciidanka Qalabka Sida.....	51

QAYBTA 1: Sida loo Helo Ruqsadaada Darawalka

- Akhri dhammaan buug tusmeedkaan
- Soo uruuri dukumiintiga cadeynta aqonsiga adoo adeegsanaaya [Liiska Dukumiintiyada la Aqbalaayo](#)
- Akhri buug tusmeedkaan si aad ugu baasto imtaxaanka aqoonta (Arag Qaybaha 2 ilaa 10)
- Hel Kaarka Aqoonsiga Ogolaanshaha Casharka ee Ku Meel gaarka ah (TIPIC) (Ka eeg bogga xiga)
- Dhamayso koorsada tababarka waxbarashada darawalka iyo dhammaan saacadaha gaari wadista ee qasabka ah haddii shuruudaha soo socda midkood ku quseeyo:
 - Aad ka yar tahay 21 sano jir
 - Aad haysato daganaansho ku meel gaar ah aadna jirto 21 sano ama ka wayn
- Mudeyso oo ku baas imtaxaanka gaari wadista (tijaabada xirfadaha maareynta gaariga iyo ku wadista wadada) (Ka eeg Qaybta 11)
- Soo iibso ruqsadaada Gaari Wadista (Ka eeg Qaybta 12)

BAARITAANKA ARAGGA IYO IMTAXAANKA AQOONTA

Marka aad gaarto da'da 15 sano iyo lix bilood, waxaad buuxinaysaa da'da ugu yar ee marista baaritaanka aragga iyo imtaxaanka aqoonta.

Baaritaanka Aragga

Waa in aad buuxisaa heerarka aragga kahor inta aadan helin Ruqsadda Darawalka. Haddii aad xirato ookiyaale ama muraayado, soo qaado. Xadidaadaha gaari wadista ayaa lagu dabihi karaa ayadoo lagu saleynaayo natiijooyinka baaritaanka aragga.

Imtaxaanka Aqoonta

Akhri oo baro dhammaan qaybaha ku qoran buug tusmeedkaan si aad ugu adeegsato imtaxaanka aqoonta. Adeegso [Imtaxaanka Aqoonta ee Muunada ah](#) si aad u aragto qaabka su'aalaha loo waydiinaayo. Imtaxaanka waxaa ku jira 40 su'aalaha dookhyada ah (ayadoo heerka baasidu ee 75% loo baahan yahay) waxaana lagu heli karaa Luuqada Dhagoolka ee Mareykanka (ASL), Carabiga, Jayniis, Ingiriis, Faransiis, Haitian Creole, Jabaaniis, AF-ruush, Soomaali, iyo Isbaanish. Waxaad adeegsan kartaa turjumaankaaga gaarka ah ee dhammaan luuqadaha kale adoo balan ka qabsanaaya [Xarunta Imtaxaanka Darawalka](#) keliya.

- Haddii aad baasto – Booqo [WakaaladA ruqsad Bixinta ee Ku Xigeenka Diiwaanka](#) si aad u iibsato Kaarka Aqoonsiga Ogolaanshaha Casharka ee Ku meel gaarka ah (TIPIC) 60 maalmood gudahood marka aad ku baasto imtaxaanka (ka eeg macluumaadka TIPIC bogga xiga).
- Haddii aad ku dhacdo imtaxaanka - waa in aad sugtaa hal maalin kahor inta aadan ku celin imtaxaanka. Ma jiro xadi ku xiran inta jeer ee aad qaadan karto imtaxaanka aqoonta, laakiin waxaad keliya qaadan kartaa halmar maalintii.

Imtaxaanka Aqoonta ayaa lagu heli karaa qaababka soo socda:

- Oonlayn uga samee [Adeegyada Oonlaynka BMV](#) (labo iskuday ayaa la ogol yahay lixdii bilood kasta).
- Si toos ah ugu gal [Xarunta Imtaxaanka Darawalka ee BMV](#) (iskudayada aan xadidnayn, halmar maalintii).
- Si toos ah ugu gal [Wakaaladaha Ruqsadda ee Ku Xigeenka Diiwaan hayaha BMV](#) (iskudayo aan xididnayn, halmar maalin kasta).

Caawimaadaha Naafada:

BMV ayaa fahmaysa in caawimaado gaar ah loogu baahan karo qof si uu u sameeyo imtaxaanka aqoonta ama xirfadaha. Caawimaadaha lagu heli karo marka laga codsado Xarunta Imtaxaanka Darawalka waxaa kamid ah imtaxaanka aqoonta oo cod ah, imtaxaanka aqoonta oo ah warqad daabacan, imtaxaanka aqoonta ee Luuqada Dhagoolka ee Mareykanka, iyo casharada sawirada ah inta lagu jiro imtaxaanka gaari wadista (oo gaar u ah shaqsiyaadka dhagoolka ah ama maqalkoodu culus yahay).

Si aad u codsato caawimaado aan liiska ku jirin, iimeylu dir Iskuduweyaasha ADA ee Ohio Department of Public Safety oo aad ka helayso HRRrequestADA@dps.ohio.gov.

QAYBTA 1:

- **BAARITAANKA ARAGGA IYO IMTAXAANKA AQOONTA**
- **KAARKA AQOONSIGA OGOLAANSHAHA CASHARKA KU MEEL GAARKA AH (TIPIC)**
- **SHURUUDAHA WAXBARASHADA EE DARAWALKA EE DADKA KAYAR 21 SANO JIR**
- **SHURUUDAHA WAXBARASHADA EE DARAWALKA EE DADKA HAYSTA DAGANAANSHAHA KU MEEL GAARKA AH EE DA'DA 21 IYO KA WAYN**
- **MOOTOOYINKA OHIO**

QAYBTA 1: Sida loo Helo Ruqsadaada Darawalka**KAARKA AQOONSIGA OGOLAANSHAHA CASHARKA KU MEEL GAARKA AH (TIPIC) – ORC 4507.05**

Marka aad si guul leh u dhameeyso baaritaanka aragga iyo imtaxaanka aqoonta, booqo [Wakaalada Ku iigeenka Diiwaan Hayaha Ruqsadda](#) 60 maalmood gudahood si aad u iibsato TIPIC.

- Haddii TIPIC aan la iibsan 60 maalmood gudahood, codsaduhu waa inuu dib u soo bilaabaa baaritaanka aragga iyo imtaxaanka aqoonta.
- Codsaduhu waa inuu keenaa dukumiintiyada ku jira [Liiska Dukumiintiyada la Aqbali kar](#) si loo cadeeyo qayabha soo socda ee aqoonsiga.
 - Magaca buuxa oo sharciga ah
 - Taariikhda dhalashada
 - Lambarka Social Security (haddii aad haysato)
 - Caddayn waddaninimo ama degganaansho sharci ah
 - Ciwaanka gobalka Ohio ah (labo dukumiinti oo cadeynaysa ciwaanka ayaa loogu baahan yahay si loo baxsho kaarka waafaqsan sharciga federaalka)
- Haddii codsaduhu ka yar yahay 18 jir, waalidka ama masuulka codsaduhu waa inuu keenaa codsiga TIPIC oo ay wada saxiixeen.
- Haddii codsaduhu haysto kaarka Aqoonsiga Ohio (ID), waa la kansali doonaa marka TIPIC la siiyo. Qof dagan Ohio ayaa haysan kara keliya hal Ruqsadda Darawalka ah ama kaarka aqoonsiga markiiba.

Xadidaadaha TIPIC

- **Kayar da'da 16:** haddii uu ka yar yahay da'da 16, darawalku waa inuu haystaa waalid, masuul, wakiil, macalinka gaari wadista oo ruqsad leh, ama qof jira 21 sano ama kawayn, oo noqonaaya *damiin*, oo la socda oo fadhia kursiga rakaabka ee geeska ruqsad haysta.
- **Da'da 16 ilaa 17:** La wadista darawal kasta oo haysta ruqsad sax ah, da'da 21 sano ama ka wayn jira, oo fadhiya kursiga shirka hore ee rakaabka ayaa la ogol yahay, **marka laga reebo** laga bilaabo 6 a.m. markaas oo ay qasab tahay inuu darawalka la socdo waalid, masuul, ama wakiil haysta Ruqsada Darawalka oo sax ah.
- **Da'da 18 iyo ka wayn:** PKu tababarashada gaari wadista keliya haddii uu la socdo darawal ruqsad leh oo jira 21 sano ama ka wayn.
- **Dhammaan da'aha:**
 - Darawalladu waa inay sitaan TIPIC markasta marka ay gaari wadaan.
 - Qofka wayn ee kursiga shirka hore saaran waa inuusan cabsanayn.
 - Darawalka iyo dhammaan rakaabku waa inay xidhaan suumanka badqabka.
 - Adeegsiga aalada moobilka elektarooniga ah waa mamnuuc inta aad gaariga wado.
 - Wadarka guud ee dadka saaran gaariga ayaan ka badan karin wadarta guud ee tirada suumanka badqabka ee gaariga lagu rakibay.

Qaybta 1: Sida loo Helo Ruqsadaada Darawalka

SHURUUDAHA WAXBARASHADA EE DARAWALKA (DADKA KA YAR 21 SANO)

Si uu u helo Ruqsadda Darawalnimada, darawalka kayar 21 sano waa inuu buuxiyaa shuruudahaan:

- Waa inuu dhamaystaa casharka waxbarashada darawalka ee dugsi tababarka darawalka ruqsadda leh asagoo 24 saac ku qaadanaaya fasalka ama casharka oonlaynka ah, iyo 8 saacadood oo wakhtiga gaari wadista ah.
- Waa inuu dhamaystaa oo buuxiyaa 50 saacadood oo gaari wadis ah uuna la socday darawal ruqsad leh oo u qalma (arag Xadidaadaha TIPIC oo ku qoran bogga hore), asagoo ugu yaraan 10 saacadood oo kamid ah gaariga waday habaynkii.
- Waa inuu haystaa TIPIC ugu yaraan lix bilood. (Quseysa darawallada kayar 18 sano jir KELIYA).

SSHURUUDAHA WAXBARASHADA EE DARAWALKA (DADKA HAYSTA DAGANAANSHAHA KU MEEL GAARKA AH EE DA'DA 21 IYO KA WAYN)

Oof daganaansho ku meel gaar ah haysta waa qof aan ahayn muwaadin Mareykanka ah ama aan haysan daganaansho rasmi ah sida ku cad sharciyada socdaalka ee Mareykanka, laakiin haysta joogitaan sharci gudaha wadanka.

Si uu u helo Ruqsadda Darawalnimada, darawalka haysta daganaanshaha ku meel gaarka ah ee jira 21 sano ama ka wayn waa inuu buuxiyaa shuruudahaan:

- Waa inuu dhamaystaa casharka waxbarashada darawalka ee dugsi tababarka darawalka ruqsadda leh asagoo 24 saac ku qaadanaaya fasalka ama casharka oonlaynka ah, iyo 8 saacadood oo wakhtiga gaari wadista ah.
- Waa inuu dhamaystaa 50 saacadood oo gaari wadis ah uuna la socday darawal ruqsad leh oo u qalma oo jira 21 sano ama ka wayn, asagoo ugu yaraan 10 saacadood oo kamid ah gaariga waday habaynkii.
- Waa inuu haystay TIPIC ugu yaraan 14 maalmood.

Haddii aad tahay qof haysta daganaansho ku meel gaar ah oo aad hadda haysato ruqsadda aan dhicin ee dibada wadanka oo aad ka haysato Canada, France, Germany, Japan, South Korea ama Taiwan, waa lagaa dhaafayaa shuruudahaan, waxaadna ruqsadda darawalka ee Ohio ku helaysaa in aad keento ruqsadaada hadda wakhtiga codsiga.

Ka hel dugsi gaari wadis iyo macluumaad dheeraad ah [Tababarka Darawalka ee Ohio](http://www.drivertraining.ohio.gov) (www.drivertraining.ohio.gov).

MOOTOYINKA OHIO

Hel ruqsadda wadista mootada ama kordhinta heerka adoo buuxinaaya imtaxaanka xirfadaha mootada oo aad ku galayso Xarunta Imtaxaanka Darawalka ama buuxinaaya Koorsada *Xirfadaha Mooto Wadista ee Aasaasiga ah ee Ohio*. [Buug tusmeedka Wadaha Mootada](#) (MOP 0001) wuxuu tilmaan dheeraad ah ka bixiyaa sidii aad ku heli lahayd kordhinta heerkaaga wadista mootada.

Iska diiwaan geli koorsada tababarka wadista mootada oo ka hel macluumaad dheeraad ah barta [Mootada Ohio](http://www.motorcycle.ohio.gov) (www.motorcycle.ohio.gov).

QAYBTA 2: Kahor inta aadan Gaari Wadin

KORMEERKA GAARIGAAGA

Marka laga hadlaayo badqabka wadada, ma xakamayn kartid darawallada kale ama xaaladaha wadada, laakiin waxaad maamuli kartaa dayactirka gaarigaaga. Xaqiiji in gaarigaagu amaan u yahay adiga iyo rakaabka kahor inta aadan wadin.

Xeerarka Qalabka Gaariga – ORC 4513 iyo OAC 4501:2-1

Sharciga Ohio ayaa sheegaaya:

"Qofna kuma wadi karo ama kuma kaxayn karo, ama si kas ah uguma fasixi karo in lagu kaxeeyo ama lagu wado, wax kamid ah wado wayn, wax gaari ah ama dhamaan noocyada gawaarida kuwaasoo qaba xaalad aan amaan ahayn oo qof dhaawici karta."

Wadaa intaas dheer, baabuurna waa in aanu yeelan ama loo oggolaan inuu yeesho wax ka soo jeeda, wax jaban oo af fiiqan ama qayb gaadhiga ah oo khatar ku ah qofka gaadhiga u soo dhawaada.

Sharciga Ohio wuxuu sidoo kale qeexayaa qalabka loogu baahan yahay gaariyaasha iyo shuruudaha ay tahay in qalabkaasu buuxiyo.

Gaariga caadiga ah ee matoorka ku shaqeeya waa inuu leeyahay qalabkaan:

- **Qaabka isteerinka** oo si caadi ah u shaqeynaaya, aana lahayn wareeg xad dhaaf ah oo dhanka taayirka isteerinka ah
- **Taatirada** oo leh shaagag dhan ugu yaraan 1/16-inji oo qoto ah aana lahayn duleello waawayn, meelo buusan, ama cilad
- Ugu yaraan **labo suumanka kursiga ah** oo ku xiran kursiga hore
- Bareegyada:
 - **Bareegga adeegga** kaas oo ku filan tartiibinta, joojinta, iyo xakamaynta gaariga
 - **Bareegga baakinka** kaas oo ku filan ku qabashada gaariga booska
- Nalalka:
 - Labo nalalka **hore ah**, hal mid dhinac kasta, oo si fiican u shaqeynaaya
 - Labo **nalalka fareejada ah** oo ku yaala gadaasha gaariga, loogana jeedo 300 cagood meel u jirta
 - Hal **nalka danbe ah** kaas oo baxsha nal cas, oo looga jeedo meel gaariga u jirta 500 cagood
 - Labo **nalalka cas ee joogsiga ah** (nalalka bareega) oo looga jeedo meel u jirta 500 oo cagood marka bareegga la qabto
 - **Nalka cad** oo ifinaaya taargada gadaal u dhagan, oo looga jeedo meel u jirta 50 cagood
- **Fareejooyinka leexashada** oo si fiican u shaqeynaaya, oo looga jeedo 300 oo cagood:
 - Labo ku yaala horta gaariga
 - Labo ku yaala gadaasha gaariga
- **Suufka tirtira muraayadda daaqada** ioo si fiican u shaqeynaaya, oo awood u leh inuu si nadiif ah u sifeeyo muraayada hore
- **Muraayada danbe** oo bixinaysa muuqaalka aan xanibnayn ee gadaasha gaariga
- **Hoonka** sida fiican u shaqeynaaya, oo laga maqli karo meel u jirta 200 oo cagood, loola aqoonsan karo hoonka gaari matoor leh
- **Nidaamka qashin saarka** oo si wanaagsan u shaqeynaaya oo si sugan u shaqeynaaya
- **Gudbiyaha nalka daaqada** oo leh heerka boqolkiiba ee la aqbali karo:
 - Muraayada hore: 70% gudbidda nalka (caadi u ah inta badan gaariyaasha cusub)
 - Daaqadaha geeska ee kursiga hore: 50% gudbinta nalka, oo lagu daray ama laga jaray 3%

QAYBTA 2:

- **KORMEERIDDA NALALKA BAABUURKA -TAAYARADA**
- **BOOSKA DARAWALKA: WAX KA BADELKA KURSIGA IYO MURAAAYADA**
- **XAKAMAYNADA BADQABKA -BUUFINNADA AARIYADA -SUUMANKA BADQABKA**

Gaarigaagu ma leeyahay dib u celinnada badqabka? Ku raadi dib u celinnada Lambarka Aqoonsiga Gaariga (VIN) ee Baabuurkaaga adoo galaaya mareegta National Highway Traffic Safety Administration (NHTSA): <http://www.nhtsa.gov/recalls>.

QAYBTA 2: Kahor inta aadan Gaari Wadin

Badqabka Taayirka

Isku dhacyada ka dhasha dayactirka taayirka waa kuwo laga hortagi karo, talaabooyin fudud ayaana badbaadin kara nafta. Gaari ku wadista taayiro aan lahayn aariyo ku filan ama si xad dhaaf ah loo aariyeeyay ama taayiro aan lahayn shaag ku filan ayaa keeni kara ciladaha badqabka wadada.

Buufinta Taayirada:

- Ku joogtee taayirada heerka cadaadiska ay shirkada soo saartay ku talisay. Heerka cadaadiska taayirka ee shirkada gaariga samaysay ku talisay, oo lagu cabiro PSI, ayaa ku qoran janbiga albaabka.
- Hubi cadaadiska taayirka marka taayiradu ay ku jiraan heerkul lamid ah tan hawada ku xeeran.
- Furka ka saar caarada aariyada oo adeegso faashada cadaadiska si aad u hubiso cadaadiska taayirka.
- Haddii tiradu aad u hoosayso, aariyee taayiradaada ilaa herka saxda ah. Haddii lambarku aad u sareeyo, ka dhin aariyada tuubada taayirka.

Dhumucda Shaaga — Taayir ku jira xaalad amaan ah wuxuu leeyahay heerka ugu hooseeya ee dhumucda 1/16-inji shaaga wadada mana lahan meelo soo buusan ama burtuqyo muuqda, dilaacyo, ama waxyeellada shaaga. Qaab guud oo lagu hubiyo dhumucda shaaga taayirka waa shiinka Mareykanka. Geli shilinka uu ku yaalo madaxa Madaxwayne Abraham Lincoln duleelka ugu qotoda dheer taayirka. Haddii aad u jeedo dhammaan madaxa Madaxwaynaha, yaairkaagu aad ayuu u murxay—haku wadin gaariga, oo xaqiiji in aad badesho.

Taayirada Kurtinta leh — Gudaha Ohio, taayirrada kurtinta lehi waa sharci laga bilaabo Noofambar 1 illaa Abriil 15.

Baro marka aad Isticmaalayso Nalalkaaga

Nalalka hore — Sharciga Ohio yaa ka doonaaya nalalka hore inay shidnaadaan qorax dhac ilaa qorax soo bax, maraskat oo aan si fiican wax loo arkayn (roob, baraf, ceeryaamo, iwm.), iyo markasta oo gacannada tirtira muraayada hore la adeegsanaayo sababla xiriirta uurka. Nalalka hore ee iftiinka badan ayaa la adeegsan karaa markasta oo nalalka hore la adeegsanaayo marka laga reebo marka gaari kale hortaada kasoo socdo.

Fareejooyinka leexashada waa — Isticmaal fareejooyinka leexashada marka loo leexanayo bidix ama midig, si aad u beddasha jihada waddada, ama si aad u badasho haadka marka aad marayso waddo dhowr haad ah. Shidd fareejada leexashada ugu yaraan 100 cagood kahor inta aadan leexan.

Nalalka Digniinta — Adeegso nalalka digniinta si aad u kordhiso aragga gaariga taagan dhexda ama aaga wadada.

BOOSKA DARAWALKA: WAX KA BADELKA KURSIGA IYO MURAAAYADA

Wax ka badelka kursiga Darawalka — Baro qaab fadhiga wanaagsan ee gaari wadista adoo kor u fariisanaaya oo dhabarkaaga saaraaya kursiga cagahana dhulka dhigaaya. Kahor wadista gaariga, wax ka badelka kursiga si aad qaab faseex ah ugu aragto horta gaarigaaga aadna si buuxda cagta ugu hayso sheelaraaha iyo isteerinka, adoo boos ku filan u dhaafaaya kicinta aariyada. Marka kursigaaga si sax ah loo fariisiyo:

- Cagtaadu waa inay si dabacsan ugu nasataa bareega ilaa sheelaraaha adoo ciribtaada ku haynaaya dhulka.
- Qaybta sare ee isteerinku aysan ka sarayn qaybta kore ee garbahaaga iyo heerka gadhka ka hooseeya.
- Waa in ugu yaraan 10 inji u dhaxaysaa laabtaada iyo isteerinka si aad ugu ogolaato boos ku haboon buufinta aariyada.
- Suumanka madaxa ayaa la hagaajiyaa si suumanka madaxu ay u qabtaan jeegada madaxaaga oo aysan ka hooseynin heerka dhegahaaga, si looga fogaado dhaawaca qoorta.



QAYBTA 2: Kahor inta aadan Gaari Wadin

Toosinta Muraayadaha — Kahor intaadan wadi baabuurkan, ku hagaaji muraayadaha muuqaalka ugu fiican ee dhinacyada iyo gadaasha baabuurka.

- Gudaha muraayad haadka: Muraayad haadku waa muraayada koobaad ee laga arko gadaasha gaariga. Hagaaji si fareemyada daa'qada danbe, oo socodka gaariga gadaal ka socda uu ka muuqdo muraayada.
- Muraayadaha bannaanka: Muraayadaha dibadda ee sida saxda ah loo hagaajiyay waxay yareeyaan meelaha qarsoon waxayna bixiyaan aragtida ugu badan ee dhinaca iyo gadaasha ee labada dhinac ee baabuurka. Ku yaree meelaha qarsoon hagaajinadaan:
 - Muraayada geeska bidix:
 - ◆ Madaxaaga ku nasi daaqadda dhinaca darawalka ee xiran
 - ◆ Hagaaji muraayadda ilaa cidhifka bidix ee baabuurka si dhib yar loo arki karo.
 - Muraayada dhinaca midig:
 - ◆ U janjeerso dhanka midig si madaxaagu si toos ah uga sarreeyo aaga marshada.
 - ◆ Ku hagaaji muraayadda dhinaca midig ilaa cidhifka dambe ee baabuurka si dhib leh loo arki karo. Ma arki doontid dhinaca bidix iyo midig ee baabuurka marka aad muraayadaha dibadda ku jaleecdo; hase yeeshee, hagaajintani waxay ku daraysaa 12 ilaa 16 darajo aag daawasho dheeraad ah dhinac kasta oo baabuurka ah. Intaa waxaa dheer, tani waxay u oggolaanaysaa baabuurka ka soo jeeda dhinaca dambe inuu u guuro muraayadda dhinaca-aragga geeska, ka dibna marka uu ka tago muraayadda-dhinaca, baabuurka ayaa ka muuqda labada gees ee darawalka.

XAKAMAYNADA AMAANKA

Buufinnada Aariyada — Buufinnada aariyadu waa xakameyn dheeri ah waxaana loogu talagalay inay sida ugu fiican ugu shaqeeyaan marka lagu daro suumanka badbaadada. Marka shil dhaco, buufinnada aariyada iyo suunka badbaadadu waxay yareeyaan fursada ah in madaxa iyo qaarkaaga sare ay ku garaacmaan qayb ka mid ah gudaha baabuurka. Akhri buug-tusmeedka mulkiilaha gaarigaaga si aad u hesho macluumaad gaar ah oo ku saabsan buufinnada aariyada ee gaarigaaga.

Suumanka Badqabka — Suunka badbaadada qasabka ah ee Ohio wuxuu ka raba dirawalada iyo dadka fadhiga xaga hore ee inay xidhaan suunka badbaadada mar kasta oo ay gaadhiga wadaan ama ay fuushan yihiin gaadhi wadooyinka Ohio.

Suunka badbaadada waa in la xidho xataa haddii gaadhiga ay ku rakiban yihiin buufinnada aariyada.

Had iyo jeer xidho suunkaaga badbaadada oo hubi in dhammaan rakaabku xidhaan suumanka badbaadada ama xakamaynta ilmaha. Dirawaliinta iyo dadka fadhiga kuraasta hore ee baabuurta waa inay xirtaan suunka badbaadada. Darawalada ka yar 18 sano jir, tirada dadka saaran gaarigu waxay ku kooban tahay tirada suumanka badbaadada ee markii hore lagu rakibay dhammaan dadka saaranna waa inay xidhaan suumanka badbaadada.

Waa muhiim inaad si sax ah u xirato suunka badbaadada:

- Suunka badbaadada waa in lagu xidhaa aagaga lafaha leh (garbaha iyo miskaha).
- Suunka garabka ayaa lagu xidhaa garabka iyo laabta iyadoo ay yar tahay, haddiiba ay jirto, ceego. Haku xidhin suunka garabka gacanta ama dhabarka dambe. U xidhashada suunka si khaldan waxay sababi kartaa dhaawacyo gudaha ah oo halis ah marka shil dhaco.
- Hagaaji suunka dhabta si uu u qabto oo uu si dhow u qabto miskahaaga ka dib markaad giiijiso. Haddii kale, marka shil dhaco, waxaad ka soo bixi kartaa suunka, taasoo keenta dhaawac ama dhimasho.

Sidee buu u eg yahay suunka kursiga ee habboon?

Suumanka gaariga ayaa si fiican u habboon marka:

- ✓ Suunka garabka in uu marayo bartamaha laabta iyo garabka.
- ✓ Suunka dhabta in uu dul saaran yahay bowdada korkoode, ma aha caloosha.



Had iyo jeer si sax ah ugu xidh carruurta da'doodu tahay 12 iyo kuwa ka hooseeya kursiga dambe!

QAYBTA 3: Feejignoow

Wadista gaarigu waa mid ka mid ah hawlaha halista badan ee aad qaban doonto inta aad nooshahay. Awooddaada inaad si badbaado leh u waddid gaariga waxay ku xidhan tahay caafimaadka wanaagsan iyo qaadashada go'aannada saxda ah.

ARAGA

Sababtoo ah inaad si fiican wax u aragto ay aad muhiim ugu tahay gaari wadista badbaadada leh, si joogto ah indhahaaga ha u eego dhakhtarka indhuhu.

- Haddii aad ku dhammaystirto baadhista aragga adoo xiran muraayadaha sixidda, shatiga darawalkaagu waxa uu muujin doonaa xannibaad aragga oo waa in aad had iyo jeer xidhataa muraayadaha sixitaanka marka aad baabuur wadid.
- Iska ilaali xirashada ookiyaaha madoow ama beensalka ah habaynkii.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan heerarka aragga ee Ohio, ka eeg Xeerka Sharciiga Mamulka ee Ohio (OAC) 4501:1-1-20.

<https://codes.ohio.gov/ohio-administrative-code/rule-4501:1-1-20>

QAYBTAAN:

- ARAGA
- DAAL
- GAARI WADISTA DARAN
- KA MASHQUULIDA BAABUUR WADISTA
- KHAMRADA, DAROOGADA, IYO GAARI WADISTA

DAAL

Daalku waa daal jidheed ama maskaxeed oo uu sababi karo culays jidheed ama maskaxeed, hawlo soo noqnoqda, jirro, dawooyin, ama hurdo la'aan. Daalku waxa uu wax u dhimi karaa araggaaga waxana uu dhimi karaa wakhtiga falcelintaada.

GAARI WADISTA DARAN

Gaari wadista wayraxa leh waxay dhacdaa marka shakhsigu si ula kac ah u sameeyo fal khatar gelinaya dadka kale ama hantida. Tusaalooyinka wadista wayraxa leh ayaa ah xawaaraha dheereeya, raacitaanka gaari kael heer aad ugu dhow, isbeddelada haadka aan badbaadada lahayn, fareejaynta khaldan, iyo ku guuldareysiga addeecidda calaamadaha taraafigga iyo calaamadaha digniinta.

KA MASHQUULIDA BAABUUR WADISTA

Ka mashquulidu waa wax kasta oo kala tagaya niyadaada inaad wado baabuurka, haddii ay tahay mid aad gacantaada kaso qadayso isteerinka, indhahaaga ka leexinaysa isteerinka, ama mid maskaxeed oo maskaxdaada ka saaraysa baabuur wadista.

Gaari wadista adoo mashquulsan waxay keeni kartaa shilal u geysta dhaawacyo halis badan adiga, rakaabka, dadka lugaynaya, ama darawallada kale.

Ka fogow dhammaan noocyada mashquulka - ku hadalka taleefanka gacanta, fariimaha qoraalka ah, doodaha ama wada sheekaysiga dareenka leh ee rakaabka, ama wax cunidda marka aad baabuur wadayso. Xaqiiji in carruurta iyo xayawaanka ay si wanaagsan u nabad qabaan.



Indhaha oo
aad jidka
ka jeediso



Gacmaha
oo aad ka
qaado
isteerinka



Maskaxdaa
da oo aad
ka saarto
baabuur
wadista

QAYBTA 3: Feejignoow

Gudaha Ohio, waa sharci-darro inaad gaadhi waddo adigoo mashquulsan. Tani waxa kamid ah isticmaalka aaladda isgaadhsiineed ee wireless-ka elektarooniga ah.

Darawalada da'doodu tahay 18 iyo kaweyn — Waa sharci daro xaaladaha badankooda in la isticmaalo, la hayo, ama jidh ahaan loo taageero taleefanka, ama aaladda isgaadhsiineed ee wireless ka electarooniga ah marka baabuurka lagu wado waddooyinka Ohio. Haddii sarkaal uu arko xadgudub, waddada ayuu kaa saari karaa.

Sharcigu waxa uu u oggolaanayaa darawalada ka weyn 18 sano jir inay dirsan karaan ama heli karaan wicitaano iyaga oo isticmaalaya tiknoolajiyada "aan gacanta u baahnayn", waxana isticmaali karaan qaybaha kale ee aaladda, hadii aysan aalada qabanayn ama taageerayn, ama aysan xarfaha, lambarrada iyo calaamadaha gacanta ku galinayn. Darawaladu kaliya waxa ay kaga shaqaysiin karaan ama xidhi karaan aaladdooda hal taabasho ama salaaxid.

Waxyaalaha la ogol yahay waxaa ka mid ah:

- U gudbinta xaalad degdeg ah sharci fulinta, isbitaal, bixiye adeeg caafimaad, waaxda dabka ama hay'ad xaaladaha kale ee degdeg ah oo lamid ah.
- Waxaa lagu haynayaa mobilka dhegta kaliya marka lagu gudajiro wada hadalka taleefanka, haddii wicitaantu uu ku bilaabmay ama lagu jari karo hal taabasho ama salaaxid oo kaliya.
- Haynta ama isticmaalka taleefanada ama aaladaha elektarooniga ah marka la taagan yahay laydhka taraafiga ama lagu jiro baarkinka ama jid weyn inta lagu jiro xaaladaha degdega ah ama waddo xidhnaanta.
- Ka jawaabayasha ugu horeeya (Sharci fulinta, dabka EMS) iyaga oo u isticmaalaya aaladaha elektarooniga ah sidii qayb kamid ah shaqadooda rasmiga ah.
- Shaqaalaha howlaha-guud ee ku shaqaynaya baabuurta danaha guud kuwaasi oo ka shaqaynaysa xaalad degdeg oo gaar ah ama xaaladaha faraha ka baxay.
- Hawlwadeenada laysinka haysta ee isticmaalaya raadiyaha isgaadhsiinta.
- Darawalada babuurta waaweyn ee ganacsiga ee isticmaalaya xogta terminalka ee mobilka.

Ganaaxyada, sharciga hoos yimaada, waala xoojiyay.

- **Khaladka 1aad muddo laba sano gudahood ah:** 2 dhibcood oo lagu qiimeynaayo Ruqsadda Darawalka, ganaax dhan ilaa \$150. Dhammaystirka kooraska mashquulida wadistu waxa uu kaa caawin karaa inaad iska ilaaliso ganaaxa iyo dhibcaha.
- **Khaladka 2aad muddo labo sano gudahood ah:** 3 dhibcood oo lagu qiimeynaayo Ruqsadda Darawalka, ganaax dhan ilaa \$250.
- **3aad ama ka badan muddo labo sano gudahood ah:** 4 dhibcood oo lagu qiimeeyay ruqsadda Darawalnimada, ilamaa \$500 oo ganaax ah, suurogalnimada hakinta Liisanka Darawalnimada 90 maalmood.
- Ganaaxyada waa la laba jibaaraa haddii sharci jabintu ay ka dhacdo goob shaqo.

Darawalada kayar 18 Sano — Waa sharci daro isticmaalka aaladda kasta elektarooniga ah marka baabuurka la wado, xataa kuwa gacanta aan u baahnayn, ama marka la taagan yahay laydhka taraafigga ama socodka taraafiggu markuu taagan yahay.

- Waxaa ogolaansho gaar ah la siiyay aalad loogu talagalay jihataynta wadada la marayo ama wacitaanka adeegyada degdega ah.
- Jabinta sharcigan waa danbi 'wayn' (waa sabab rasmi ah oo gaariga lagu joojin karo):
 - Jabinta koowaad: 60 maalmood oo lagaa hakinaayo Liisanka Darawalnimada iyo ganaax dhan \$150.
 - Jebinta labaad: 1 sano oo ah Joojinta Liisanka Darawalnimada iyo \$300 oo ganaax ah.

KHAMRADA, DAROOGADA, IYO GAARI WADISTA

Gudaha Ohio, waa sharci-darro in baabuur lagu kaxeeyo iyada oo qofku ku sakhraansan yahay khamriga iyo/ama daroogada. Xataa daawooyinka si sharci ah loo qoray ama laga gadan karo suuqa waxay saamayn karaan awooda gaari wadista ee qofka.

Saamaynada Khamriga iyo Daroogada:

- **Aragga** — Waxay keeni kartaa aragga oo xumaada; awoodda diiradda gaabis noqota; iyo hoos u dhaca awoodda lagu qiimeeyo masaafada, xawaaraha, iyo dhaqdhaqaaqa baabuurta kale
- **Wakhtiga Falcelinta** — Waxay gaabis ka dhigaysaa awoodaada fahanka macluumaadka iyo ka jawaabista shaqada gaari wadista
- **Garashada** — Waxay hoos u dhigtaa awoodaada inaad wax ka ogaato agagaarka oo aad samayso go'aamo degdeg ah

Si aad u sii fahamto cawaaqib xumada ka dhalan karta gaari wadista adoo naafaysan, ka eeg shilalka Ohio iyo dhaawacyada shilalka Bogga Ohio State Highway Patrol ee [OVI](#).

QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

XADIYADA XAWAARAHA - ORC 4511.21

Xadidaadaha xawaaraha waxa loo tixgaliyaa xawli macquul ah oo ku salaysan nakhshadda wadada, xadiga taraafig la filayo, iyo cimilo qalalan oo aan lahayn ceeryaamo ama arimo kale oo saamaynaya aragga. Xaaladaha aan ku habboonayn (tusaale ahaan, cimilada xun, xaaladaha wadda xun, ama tirada gaariyaasha wadada oo sarreeya), xawaaraha macquulka ah waxa laga yaabaa inuu ka hooseeyo xadka xawaaraha la dhejiyay. Xawaaraha macquulka ah ayaa lagama maarmaan u ah darawalka si uu u ilaaliyo xakamaynta baabuurka oo uu ku joojiyo masaafo qeexan oo la hubo kahor.

Iyadoo aan loo eegin xadka xawaaraha la dejiyay, sharciga Ohio waxa uu qofka ka mamnuucayaa in uu gaariga ku wado xawaare ka badan heerka u ogolaanaya darawalka in uu istaago fogaan ku filan.

Guud ahaan, xadadka xawaaruhu waxay ku salaysan yihiin nooca wadada (laba haad, jidad waaweyn oo kala qaybsan, iwm.), iyo meesha wadadu ku taal sida lagu qeexay tusaalooyinka hoose.

QAYBTA 4:

- XADDIDAADHA XAWAARAHA
- XAQA WADADA
- IFTIINTA TARAAFIKADA
- CALAAMADHA TARAAFIKADA
- CALAAMADHA SEEDKA GEESKA WADADA
- SEEDKA WADADA LABADA SEED EE BIDIX KELIYA LOO LEEHAN KARO
- MEELAHA WADADA LAGA GOOYO

XADDIDAADA XAWAARAHA	GOOBTA WADADA / NOOCA WADADA
	Alleys oo ku dhex yaal shirkad magaallada ah
	Aagagga dugsiga xilliga nasashada iyo marka carruurta imanayso ama ka baxayso dugsiga saacadaha caadiga ah ee shaqada
	Waddooyinka ku dhexyaal shirkad magaallada ku taala
	Wadooyin gobolka ama jidadka waawayn marka laga reebo wadooyinka galistooda la xukumo ee shirkadaha dawlada hoose ee ka baxsan ganacsiyada degmooyinka
	Wadooyinka gobolka ee gudaha shirkadaha dawladda hoose ee ka baxsan xaafadaha magaalooyinka
	Jidadka xorta ah ee leh geesaha lagu lugeeyo ee gudaha xaafadaha magaallada
	Wadooyinka xorta ah ee baadiyaha

QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

XAQA WADADA

Xaqa wadada wuxuu qeexayaa mudnaanta isu socodka wadada, taasoo la macno ah dadka lugeynaya ama baabuur wata, waxay xaq u leeyihiin in ay ka hormaraan dadka kale xaalad gaar ah ama meel gaar ah.

Si loo dhawro badbaadada dadka oo dhan, sii xaqa wadada:

- Darawalka yimaada markaas ama kaaga soo horeeyay isgoyska.
- Darawalka maraaya seedka kaasoo horjeeda marka aad bidix u leexanayso.
- Darawalka maraaya geeskaaga midig isgoysk afar irdoodka ah haddii labadiinuba soo gasheen isgoyska iskumar.
- Darawallada maraaya wadada wayn haddii aad kasoo galayso wadada wayn jid yare ama wado gaar loo leeyahay.
- Darawallada horey aan u haysan gelitaana fiican ama saaran wadada dheer haddii aad joogto meesha laga galo ama rakada xawaareynta.
- Dadka lugaynaaya, baaskiileeyda, iyo darawallada kale ee wali ku jira isgoyska (Eeg Qaybta 9 Wadaagista Wadada).
- Gaariyaasha badqabka dadwaynaha (gurmadka degdega ah, booliiska, dab damiska).
- Gaadiidka sida tacsida.

CALAAMADAHA TARAFIGA – ORC 4511.13

Calaamadaha taraafikadu waa nalal kuu sheegaya goorta aad joogsanayso iyo goorta aad baxayso. Nalalka taraafiggu inta badan waxay ku yaalaan isgoysyada waxayna kala yihiin casaan, jaalle, iyo cagaar kor ilaa hoos. Goobaha qaar ayaa laga yaabaa inay leeyihiin nalal cagaaran, huruud ah, ama casaan ah; ama nalalka taraafiggu waxa laga yaabaa inay jiifaan halkii ay kor u taagnaan lahaayeen.

MIDABKA NALKA TARAAFIKADA		ISKU SOCODKA WADADA
CASAAN		Nalka taraafigga casaanka ah wuxuu amrayaa joogsi kahor inta aanad gelin isgoyska. Waa inaad istaagtaa gadaasha laynka joogsiga, meesha jidka laga gooyo, ama isgoyska ilaa nalka taraafiggu ka noqdo cagaar.
JAALLE		Nalka taraafiga ee jaalaha ah ayaa tilmaamaya midabku inuu isu beddelayo casaan; ka taxaddar. U diyaar garoow inaad istaagto.
CAGAAR		Nalka taraafiga ee cagaarka ah macnihiisu waa inaad si taxadar leh ugu safri karto isgoyska haddii wadadu banaan tahay. Nal lagu calaamadeeyay fallaadho cagaaran ayaa tilmaamaya inaad u leexan karto dhanka falaarta adiga oo aan joogsan.
FAREEJADA JAALAH		Gaabis ku soco oo si taxadir leh u wad. U diyaargarooow inaad ka istaagto socodka gaadiidka laga yaabo inuu soo galayo isgoyska.
FAREEJADA CASAANKA		Joogso meel ka dambaysa laynka joogsiga, meesha wadada laga gooyo, ama isgoyska kahor inta aanad gelin oo si buuxda u istaagin. Hubi in wax gadiid ah uusan ku socon wadadaada safarka kahor inta aadan gelin isgoyska.
NALKA TARAFIGA AAN SHAQEYNAYN		Nalalka taraafigga ee aan shaqaynayn waxa loola dhaqmaa si la mid ah calaamad joogsi. Sii xaqa wadada oo isticmaal taxadar markaad geleyso isgoyska.

QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

CALAAMADAHA TARAAFIKADA

Calaamadaha taraafikada waxay tilmaamaan xeerarka waddooyinka, khataraha, goobta waddada, jihooyinka waddooyinka, iyo goobta adeegyada waddooyinka. Qaabka, midabka, calamadaha, iyo tilmaamaha calamadahan ayaa tilmaamo kaa siinaya nooca macluumaadka ay bixiyaan.

Calaamadaha Sharciga waxay maamulayaan dhaqdhaqaaqa waddooyinka. Calamadahani waxay ogaysiinaysaa dadka safarka ah sharciga ama xeerarka waddooyinka.



DHAMMAAN BAABUURTA SEEDKAAN WAA IN AY JOOGSADAAN KAHOR INTA AANAY SII AMBA QAADIN SOCOKA.



BAABUURTA OO DHAMI WAA INAY EEGAAN HEERKA XADKA XAWAARAHA LAGU DHAJIYEEY AAG ISKULADA AGTOODA SAACADAHA XANIBNAANTA



WAXAA LOO ISTICMAALAA WADDOYINKA HALKA SEED AH IYO MEELAHA BIXISTA WADDOYINKA



WAXAY TILMAAMAYSAA WADDO HAL-JID AH



JOOJSO KALIYA HADDII GAADIIDKA KALE AY SAAMAYSO; BOOS SII DHAMMAAN GAADIIDKA SOO GALAAYA

Calaamadaha Mamnuuca waxay u sheegaan daawadayaasha in falku uu mamnuuc yahay. Goobabada gaduudan ee jeexjeexa leh waxay u taagan tahay ereyga 'MAYA.' Mar kasta oo calaamadani ay ka soo muuqato tilmaanta, ficilka la sawiray waa mamnuuc.



LOOMA LEEEXAN KARO BIDIX



LAMA SAMAYN KARO LEEEXASHADA U



LOOMA LEEEXAN KARO MIDIG



MA GELI KARAAN BAASKIILADU

Calaamadaha digniinta waxay u sheegaan darawalka khatarta suurtagalka ah ee imaan karta. Calaamaduhu badanaa waa jaale leh xarfo ama calaamado madow waxayna leeyihiin qaab dheeman ah.



ISGOYS AYAA KAA HOREEYA



LEEEXASHADA WADADA AYAA KAA HOREYSA



DAGAAN-DEG AYAA KAA HOREEYA



ISGOYS AYAA KAA HOREEYA; U LEEEXO BIDIX AMA MIDIG



GAADIID U SOCDA JIHADA AAD KA TIMID



GAARIGA UGU DHOW BUUNDADA AYAA LEH XAQA KOOBAAD EE WADADA



BAASID WAA MAMNUUC



MEESHA BAASKIILKU KA GUDBO



ARAGGA AAGA KAA HOREEYA WAA DACIIF



LAYMANKA WADADA AYAA KAA HOREEYA



LEEEXASHADA TOOSKA AH EE DHANKA MIDIG AYAA KA HOREYSA




MEESHA DADKA LUGAYNAAYA WADADA KA GOOYAAN AYAA KAA HOREYSA



ISGOYSKA TAREENKA

QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

Calaamadaha Aaga Shaqada: Calaamadahaani guud ahaan waxay leeyihiin asal oranji ah oo gaar ah. Marka aad dhowaato aagga dhismaha, digtoonow, yaree xawaaraha, raac tilmaamaha calaamadaha, oo u firso shaqaalaha iyo qalabka waddada/wadda weyn maraaya.



Goobaha Shaqada, gaadiidka waxaa maamuli kara qof leh calaamad ama calanka hagaya taraafikada. Waa inaad raacdaa tilmaamaha. Difaacyada, sida durbaannada iyo fuuqyada, ayaa gaadiidka ka ilaaliya inay galaan waddooyinka xiran ama meelaha kale ee ay khatarta ku tahay in baabuur lagu wado. "Ka istaag" shaqaalaha dhismaha. Feejignow, yaree xawaarahaaga, una diyaargarow inaad si lama filaan ah u joogsato markaad ku soo dhawaanayso ama aad dhex marayso Goobaha Shaqada. Sii xaqa wadada, si aad boos ugu banayso shaqaalaha ama qalabka waddada yaala. Ilaali masaafo muuqata oo u dhaxaysa gaarigaaga iyo baabuurka kaa horeeya - ha "dabo dhigan." Cawaaqibka ku socoshada xawaare ka badan xadka xawaaraha la tilmaamay ("xawaarayn") ee Aagga Shaqada waxaa ka mid noqon kara ganaax laba jibaaran iyo wakhtiga xabsiga.

Qaababka Calaamadaha Tusaha waxay noqon karaan afar gees ama leydi, midabkuna wuxuu noqon karaa cagaar, buni, ama buluug. Calaamadahani waxay tilmaamaan meelaha muhiimka ah iyo adeegyada jidka weyn, macluumaadka ku saabsan waddooyinka is-goysyada, waxayna caawiyaan in darwallada loo tilmaamo magaalooyinka iyo deegaanada. Calaamadaha tilmaamuhu waxay kaa caawin karaan inaad hesho isbitaallo, kaalimaha shidaalka ama xarumaha adeegga, maqaayadaha, iyo hoteellada.



Calaamadda Lambarka Waddada: Qaabka iyo midabka calamadahani waxay tilmaamayaan nooca waddada wadada isku xirta gobolka, Maraykanka, gobolka, magaalada, degmada, ama waddada maxaliga ah. Calaamadaha isku aadka, masaafada, iwm, ee khariidadaha iyo ablikeeshinnada GPS-ka waxay ka caawiyaan socotada helitaanka wadada.



Calaamada Wadada Is-maamulka



Calaamada Wadada Isku xirta Gobolada



Calaamada Ka Bixida Wadada Isku xirta Gobolada



Calaamada Wadada Maraykanka




Calaamada Wadada Gobolka

QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

CALAAMADAHA SEEDKA GEESKA WADADA

Calaamadaha geesaha laamigu waa xariiqyo, fallaadho, erayo, ama calaamado lagu xardhay waddada. Waxay qaybiyaan seedadka wadada, waxay kuu sheegaan goorta aad dhaafi karto baabuurta kale, waxay kuu sheegaan wadiiqooyinka aad u isticmaalayso leexashada, waxay qeexaan jidadka lugaynta, waxayna ku tusinayaan meesha ay tahay inaad u istaagto calaamadaha ama calaamadaha taraafigga.

LAYMANKA CAD:
Waxay kala soocaaan gaadiidka u safraaya *isku jiho*.
Laymanka cad waxa laga yaabaa inay noqdaan layman xiriirsan ama kala googo'an (tush-tush ah).



LAYNKA XIRIIRSAN EE JAALAHA AH:
Wuxuu kala soocaa gaadiidka u safraaya *jihooyinka* iska soo horjeeda.

LAYNKA LEH LABADA XARIIQ EE XIRIIRKA AH EE JAALAHA AH:
Ha Ku wadin dhanka bidix ee xariiqda dhexe, *ilaa* inay qasab tahay maahee inaad ka gudubto laymanka isdhaafsan si aad bidix ugu leexato ama aad uga gudubto gaadhi tartiib u soconaaya (tusaale, baaskiil ama gaadhi muujinaya calaamadda gaabiska).

LAYNKA XIRIIRSAN EE JAALLAHA AH OO LEH LAYNKA KALA GOOGO'AN (DHAFTA AH):
Ka gudbida baabuurta kale waa loo ogol yahay wadayaasha ku safraya seedka leh xariiaha kala googo'an.
Gudbitaanku waa ka mamnuuc darawaliinta ku safraya haadka leh xariiq xiriir ah.

LAYNKA XARIIQYADA KALA GOOGO'AN LEH (DHASHTA LEH) EE JAALLAHA AH:
Baabuurta u socota labada dhinac miidkood waxa laga yaabaa inay dhaafaan baabuurta u socota isla jihadooda marka ay badbaado tahay inay sidaas sameeyaan.

QAYBTA 4: Xeerarka Wadada

SEEDKA WADADA LABADA SEED EE BIDIX KELIYA LOO LEEHAN KARO

Seedka leexashadadhanka bidix ee laba-geesoodka ah waxa lagu calaamadeeyay khad huruud ah oo kala googo'an iyo khad huruud ah oo xiriir ah oo dhinac kasta ah ee seedka la marshay. Waxa kale oo lagu calaamadeeyay fallaadho cad oo laba geesood ah oo bidix u jeedda ee leexashada.




Seedka dhexe ee calaamadeysan waxaa loogu talagalay leexashada bidix kaliya. Baabuurta labada dhinac ka socotaa waxaa laga yaabaa inay seedka dhexe si dhakhso ah u isticmaalan kahor inta aanay bidix u leexan. Kani maaha seed loo isticmaalo socdaalka ama baasidda.

MEELAHA WADADA LAGA GOOYO

Meelaha dadku ka gooyaan wadada ayaa qeexaya aagga ay dadka lugeynaya ay ka gudbi karaan waddada.

Waa inaad **siisaa** xaqa wadada dadka lugeynaya ee galaya ama ku jira Meelaha dadku ka gooyaan wadada. Haddii uu jiro khad joogsi ah oo ka horreeya meelaha dadku ka gooyaan wadada, khadka joogsiga waa in la addeeco.

Dhammaan meelaha dadku ka gooyaan wadada isku si looma calaamadiyo.



QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado

KICINTA GAARIGA

Ka eeg buug-gacmeedka mulkiilaha gaadhiga tilmaamaha istaaridda gaadhiga. Si aad matoorka u kiciso, cagtaada midig saar birta bareega oo ka eeg doortaha geerka baakinka. Geli furaha kicinta oo ku rog, ama riix badhanka Start.

DHAQAAJINTA GAARIGA

U dhaqaaq dooraha geerka dhanka "D" (wad). Horey ka hubi waddo nabdoon oo hubi gaariyaasha dhinacyada iyo gadaasha kaaga imaanaysa. Digniin bixi iyo hadday nabdoon tahay, cagtaada ka qaad bareega oo saar sheelaraaha kadibna tartiib u rix. Si tartiib ah oo fudud ah u xawaaree adigoo caarada cagtaadu saaran tahay sheelaraaha ciribta cagtaadana ku haya dhulka.

JOOJINTA BAABUURKA

Ka fiiri muraayadahaaga gaariyaasha ka imaanaaya xagga dambe ee gaadhigaaga. Cagtaada ka soo qaad sheelarah qaadiyaha oo saar birta bareega. Cadaadis tartiib ah ku cadaadi ilaa gaadhigaagu istaago.

Fogaanta ay qaadanayso in baabuurka si buuxda loo joojiyo waxay ku xidhan tahay dhawr arrimood:

- Waqtiga falcelinta darawalka
- Xawaaraha uu baabuurku ku socdo
- Xaaladda bireegga baabuurka
- Xaaladda laamiga (qoyan, qallalan, baraf leh, cusbo leh, jaay ah, iwm.)

U ogolow 3-4 ilbiriqsi inaad u jirsato fogaanta baabuurka kaa horreeya.

Dirawal waa inuu joogsadaa:

- Gadaasha xariiqda joogsiga ama meelaha dadka lugaynaaya wadada ka gooyaan calaamad kasta oo joogsi ama calaamad taraafikada ee gaduudan kahor inta aanad gelin isgoyska.
- Halka ka dambaysa xariiqda joogsiga ama socod kaga gudubka ee ishaaro taraafikada kasta oo casaan ku leexashada ama bidixda ama midigta la oggol yahay. Dirawalka waxaa laga yaabaa inuu sii wato casaan ku leexasho sharci ah kadib marka uu istaago oo dhinaca midigta uu u baneeyo dhammaan baabuurta dhaafaysa iyo dhammaan dadka ka gudbaya wadada.
- Nalka wadada ee falaashka digniinta cas bixinaaya, kaas oo u sheegaaya dammaan gaadiid inaysan qasab ahayn inay istaagaan.
- Marka uu soo gaadho baabuur badbaado dadwayne (sida gaadhi booliis, matoorka dabka, ama ambalaasta) shidanaaya laydhka oo bixinaya dhawaaq digniin ah, haddii aan u socon jihada kaa soo horjeeda ee wado kala qaybsan. U dhaqaaq inta ugu fog ee suurtoogalka ah ee dhinaca midigta ee wadada oo ay halkaas baaqi ku ahaadaan ilaa gaadhiga gargaarka degdega ahi dhaafayo.
- Wado ag socodka, ama haddii aanu jirin ag socod, meesha wadada laga galayo, marka aad ka soo baxayso surin, marinka guriga laga galo, ama wadada gaarka ah ee ganacsiga ama meel la degan yahay. Darawaladu waa inay dhinaca midigta siiyaan dadka wadada dhinaceeda socda.
- Kahor inta aanad gelin isgoys haddii aanay jirin meel ku haboon oo wadada dhinaceeda kale ah oo gaadhi la dhigi karo. Sharcigu wuu qabanayaa haddii calaamadaha wadadu sii dayso iyo haddii kaleba.



QAYBTA 5:

- KICINTA GAARIGA
- DHAQAAJINTA IYO JOOJINTA GAARIGA
- ISTEERINKA IYO REEFIS U BIXID
- ISGOYSYADA IYO LEEEXASHADA
- WAREEGYADA ISGOYSKA AMA WAREEGYADA GAADIIDKA
- KU SAFRIDDAA SEEFKA IYO BADELIDDA SEEDADKA
- GELISTA IYO KA BIXISTA WADADA
- BAASIDDA
- ISGOYSYADA TAREENKA
- KA JOOGSIGA BASKA DUGSIGA
- BAARKINKA

QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado

ISTEERINKA

Isteerinka u rog jihada aad rabto in baabuurka u dhaqaaqo, haddii aad horey u soconaysa iyo haddii aad gadaal u baxaysaba.

Labada gacmood dhig bannaanka isteerinka dhinacyada iska soo horjeeda, boosaska xagasha 4 iyo 8, si loo xakameeyo baabuurka oo la iskaga ilaaliyo buufinnada aariyada haddii ay soo boodaan. Qabashadaada isteerinka waa in ay ahaataa mid adag laakiin dabacsan.



DIB U BIXIDDA

Si aad gadaal ugu wado gaarigaaga si badbaado leh:

- Iska hubi gadaashaada kahor inta aanad soo galin. Carruurta iyo walxaha yaryar lagama arki karo kursiga darawalka.
- Cagtaada saar bareega oo u wareeg si dib ugu baxdo.
- Gacantaada bidix ku qabo isteerinka qaabka 12 go'an. Gacantaada midig saar dhabarka kursiga rakaabka oo si toos ah uga eeg muraayada dambe. U isticmaal muraayadahaaga si aad dib ugu wado gaariga laakiin maskaxda ku hay in muraayadahani aanay isla markiiba tusin aagga ka dambeeya gaadhigaaga.
- Isticmaal kamaradaha dib-u-bixida/daawashada qaybta danbe, haddii ay jiraan, laakiin ha isku hallayn oo keliya kaamirada dib u bixidda/daawashada qaybta danbe, maadaama aanay muujinayn aagga oo dhan.
- Si tartiib ah oo habsami leh u xawaaree, adoo xawligaaga ka dhigaaya mid gaabis ah. Baabuurkaagu aad ayuu u adag yahay in la leexiyo marka aad dib u baxayso. Wax yar u leexo jihada ay tahay in gadaasha gaadhigu u dhaqaaqdo. Haddii aad dib u baxayso adoo haddana markaad leexanaaya, si degdeg ah u hubi dhinaca hore iyo dhinacyada. Sii wad inaad eegto gadaal ilaa aad si buuxda u istaagto.

ISGOYSYADA IYO LEEASHADA.

Dhammaan isgoysyada, yaree xawaarahaaga oo raadi:

- Qalabka xakamaynta taraafikada;
- Gaadiidka soo socda iyo kuwa isgoysyada maraya, oo ay ku jiraan mootooyinka iyo baaskiiladaha - eeg bidix, midig, ka dibna bidix mar kale;
- Dadka lugaynaaya;
- Xaaladaha waddooyinka; iyo
- Meelaha aragoodu xaddidan yahay.

Leexashooyinka

Marka aad leexanayso:

- Muuji ujeedooyinkaaga.
- Ka baadh dhammaan geesaha kontaroolada taraafiggu, dadka lugaynaya, baabuurta kale iyo wixii la mid ah.
- Gal oo ilaali booska saxda ah ee haadka ugu dhow jihada aad rabto inaad aado.
- Ka fiirso leexashada ilaa meesha ugu fog ee suurtoogalka ah ee seedka loogu talagalay.
- Si habsami leh u kordhi xawaaraha ku habboon, hubi in fareejadaada leexashadaada aad joojisay, oo iska taraafikada kaa danbeeya.

QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado

Fareejada leexashada

Bidhibidhe leexasho waa in la ridaa ugu yaran 100 cagood ka hor leexashada. Tan waxaa lagu guulaysan karaa iyadoo la isticmaalayo bidh-bidhaha gaadhiga ama bidh bidhe gacanta ah.



FAREEJADA
FARSAMEYSAN EE
LEEXASHADA

BIDIX U
LEEXASHO

MIDIG U
LEEXASHO

TARTIIBI/JOOJI (HADDII
LEEXARKA BAREEGGA AYSAN
SI SAX AH U SHAQAYNAYN)

Leexashada Midig

- Ka fogoow inaad ku talax tagto bidixda kahor intaadan leexan.
- Had iyo jeer midig uga leexo qaybta midig ee haadkaaga oo u leexo qaybta midig ee ugu badan ee waddada aad u leexanayso.

Leexashooyinka Bidix

- Markaad bidix u leexanayso, boos sii gaadiidka kugu soo socda.
- Had iyo jeer bidix uga leexo qaybta bidix ee ugu badan ee haadkaaga oo gal haadka bidix ee ugu fog, oo kaliya dhanka midig ee khadka qaybinta dhexda ee wadada aad u leexanayso. Tani waxay khusaysaa sidoo kale wadada wayn ee afarta haad ah.
- Markaad bidix u leexato markaad marayso calaamada taraafig ee cagaaran, ha u sii gudbin isgoyska ilaa in ay jirto maahee fursad aad ku leexan karto. Haddii xadiga gaadiidka wadadu aanu oggolaanayn fursad, dhig xagga hore ee baabuurka heer in yar oo dhaafsiisan baarka joogsiga. U yeel dadka lugeynaya iyo taraafikada soo socda oo u leexo bidix isla marka ay nabdoon tahay in sidaas la sameeyo.




Leexashada Seedadka Badan

- Aqoonso oo gal haadka aad ka leexan doonto.
- Jidkaas joog ilaa leexashadu dhammaatay.

Ku leexashada Calaamada Taraafiga ee cas

Midig ugu Leexashada Calaamada Cas — Midig waad u leexan kartaa adoo maraaya calaamada wadada ee cas, **ilaa in calaamadu si gaar ah u mamnuucayso maahe**. Marka aad samaynayso leexadka leexashada dhanka midig fareejada casaanka ah, waa inaad marka hore istaagtaa oo aad u oggolaataa baabuurta ku dhaafaysa iyo dadka inay isgoyska baneeyaan ka hor inta aanad hore u socon.

Bidix ugu leexashada Nalka Cas — Waad u leexan kartaa bidix adoo maraaya nalka cas ee taraafiga, **keliya** adoo ka imaanaaya haadka bidix ee dariiqa hal-jidka ah una sii jeedda waddo kale oo hal-jid ah, haddii aan isgoysku lahayn calaamad ku dheggaan oo mamnuucaysa in bidix loogu leexdo calaamada nalka cas.



QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado


Tilmaamaha

- Calaamada wadada marka nalku nodo cagaar, joogso kahor inta aadan u gudbin isgoyska. Ha isku hallaynina isticmaalayaasha kale ee waddooyinka inay adeecaan tilmaamaha taraafigga ama calaamadaha, sababtoo ah waxaa laga yaabaa inaysan ku siin xaqa-dariiq.
- Marka aad la kulanto xaalad leh nalka cagaaran, laakiin gaadiidka ay buuxinayaan jidka mara isgoyska, istaag kahor isgoyska oo sug ilaa taraafikada isgoyska ay horay u soconayaan. Ha u dhaqaaqin isgoyska oo joogso. Ha xanibin isu socodka gaadiidka ee isgoyska.
- Markaad waddo u leexanayso, qaado wakhti si aad u hubiso in jidkaaga socdaalku yahay mid nadiif ah oo aysan jirin gaariyaal ku gudban. Waxaad u baahan tahay masafo weyn oo kugu filan si aad gaarigaaga u goysiiso wadada. Waxaad u baahan tahay meel bannaan oo ku filan si aad ugu leexato haadka ku habboon oo aad ugu socoto xawaare.
- Haddii baabuur soo socdaa uu fareejaynaayo calaamada leexashada, ha soo bixin ama haka hor leexin baabuurka adiga oo aan hubin masaafada saxda ah. Ha u qaadan uun in baabuurku leexanaayo. Waxaa laga yaabaa in darawalku soo leexdo ka dib marka uu dhaafo gaarigaaga ama waxaa laga yaabaa inuu illoobay inuu damiyo calaamadiisa.
- Markaad istaagto calaamada joogsiga oo aadan arki karin taraafikada goynaysa, horay u qooraanso si aad u hubiso gaadiidka kahor inta aanad gelin isgoyska.

WAREEGYADA ISGOYSKA AMA WAREEGYADA GAADIIDKA

Wareegga isgoyska ama goobaabinta taraafikada waa isgoys wareeg ah oo leh astaamo naqshadeed kuwaas oo kor u qaadaya isku socodka taraafikada ee badbaado leh oo hufan. Baabuurta waxay ugu socdaan qaabka goobinta ah agagaarka jardiinada dhexe ee kor u qaadan, iyada oo baabuurta gelaya ay siinayaan dariiq xaq wadada gaariyaasha goobinta ku socda. Markaad isticmaalayso wareegyada isgoyska ama wareegyada taraafigga:

- Markaad u soo dhawaato goob wareeg ah, hubi calaamadaha ku saabsan jihada safarkaaga. Ma beddeli kartid haad marka aad joogto agagaarka.
- Hoos u dhig xawaaraha si aad u gasho wareegga ama wareegga taraafigga.
- Ka gal wareegga isgoyska ama goobaabin taraafikada jihada wareegsan.
- Sii boos baabuurta horeba agagaarka aargada ama goobaabinta taraafikada.
- Ka eeg dhanka bidix baabuurta oo gal marka seedku banaan yahay.
- Marka aad gasho aargada, sii socio. Ha joogsan ama badelin seedka.
- Ku soc iridka saxda ah, la leexo tilmaanta, oo ka bax.
 - Adeegso iridka 1aad si aad bidix ugu leexato.
 - Adeegso iridka 2aad si aad toos ugu socoto.
 - Adeegso iridka 3aad si aad bidix ugu leexato.
 - Adeegso iridka 4aad si aad u leexato qaabka U.



SAFARKA SEEDKA

Mar dhinaca midigta ee wadada marka laga reebo marka:

- Aad dhaafayso ee aad waydaaranayso baabuurta kale oo kaa horeeya.
- Marka aad marayso wado u qaybsan saddex layn ama wax ka badan.
- Marka aad marayso wado loogu talo galay oo lagu dhajiyey calaamadaha hal-wado oo kaliya.
- Marka booliska ama aaladda gaadiidka hagtaa kugu amarto.
- Marka xanibaad ay daruuri ka dhigto inaad marto badhtanka bidixda. Sii xaqa wadada gaariyaasha soconaaya.

Marka aad ku socto wado afar haad leh, ku wad seedka midig. Adeegso seedka midigta ka xiga dhexda si aad u baasto oo bidix u leexo.

QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado

BADELIIDA SEEDADKA

Marka aad bedesho seedadka, marka hore hubi in isbadelku loo samayn karo si amaan ah si hoos lagu qeexay:

- Fiiri muraayadahaaga iyo "meelaha aan loo jeedin" ama meelaha ku wareegsan gaarigaaga oo aan la arki karin markaad isticmaalayso muraayadaha gadaale ama dhinaca, adigoo madaxa usoo rogaya oo eegaya garabkaaga jihada aad qorsheyneyso inaad u dhaqaaqdo.
- Aqoonso farqiga u dhexeeya gaariyaasha, fareejo bixi, oo mar kale iska eeg jihada beddelka haadka.
- Hagaaji xawaarahaaga iyo isteerinka si aad u waafajiso seedka.
- Dami fareejadaada leexashada.

GELISTA WADADA WAYN EE SEEDADKA BADAN

Markaad soo gasho wadada xorta ah, ka digtoonow baabuurka kaa horreeya, garabkaaga ka eeg jihada aad raacayso oo isticmaal muraayadahaaga dibadda si aad u ogaato farqiga u dhexeeya taraafikada. Calaamadee oo isticmaal seedka xawaareynta si aad u gaadho xawaaraha baabuurta kale si aad ugu biirto socodka taraafikada. Hubi inaad tirtirto calaamada leexashadaada.



KA BIXIDA WADDADA

Waa muhiim in aad taqaano meesha aad uga baxayso wadada. Qorshee inaad u guurto haadka kuugu dhow meesha aad ka baxayso goor hore si aad uga fogaato haadka degdega ah. Xawaaraha gaarigaaga ilaali ilaa inta aad ku sugan tahay wadada weyn. Calaamadee ujeedadaada, u gudub haadka hoos u dhigista oo gaabi xawaarahaaga bixida. Eeg xawaaraha ku dhagan haadka xawaaraha.

Haddii aad seegto bixistaada, qaado ta ku xigta. Ha u isticmaalin furinta khadka dhexe, kaas oo loo isticmaalo oo keliya baabuurta gurmada iyo badbaadada dadweynaha.



QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado

BAASIDDA

Sida loo baaso:


- Iska eeg gaariyaasha soo socda.
- Ka hubi muraayadahaaga iyo garabkaaga korkiisa si aad u dabo raacdo ama u dhaafto baabuurta.
- Fareejo ku muuji sida aad damacsan tahay marka ay ammaan tahay inaad ba.
- Isteerinka ugu leexi si tartiib ah seedka baasida.
- Joogtee oo wax ka abdel xawaaraha marka loo baahdo.
- Sii wad in aad baasto ilaa labada nal ee hore ee gaariga la baasay ay ka muuqdaan muraayada danbe.
- Fareejo ku muuji inaad dooneyso inaad seedka ku leexato.
- Si tartiib ah isteerinka ugu leexi seedka, adoo joogteynaaya ama kordhinaaya xawaaraha sida ku haboon.

Marka lagu baaso:

- Ku sugnoow seedkaaga.
- Joogtee xawaaraha iskumidka ah si aad ugu sahasho darawalka inuu ku baaso.

Ha iskudayin inaad baasto marka:

- Gaari uu hortaada kasoo socdo.
- Masaafada kaa horeysa uu qariyay leexo ama taag.
- Aad marayso isgoysyada.
- Kahor inta aadan goyn wadada tareenka ama buundada.




QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado

Wadada Seedadka Badan, ee Labada Jiho ah

Baasidda waa la ogol yahay marka ay amaan tahay in sidaas la sameeyo. Marka aad ku socoto wadooyinka seedadka badan, seedka ugu bidixeeya ayaa loogu talo galay in laga baaso gaariyaasha gaabiska ah marka baasidda la samayn karo ayadoo aan la carqaladeyn gaadiidka socda jiho kasta. Marna haka baasin garabka, haddii marin ku yaalo ama uusan ku oolin.


Seedadka Xariiqda Taxan leh ee Jaalaha ah ee ku yaala Wadada Labada Seed, ee Labada Jiho ah

Baasidu waa ka mamnuuc labada jhaba marka ay jiraan laynka xariiqda taxan ee jaallaha ah oo ku taala dhexda wadada. Goynta seedka dhexda ayaa la ogol yahay keliya si aad ugu leexato bidix wadooyinka yaryar ama aad u baasto gaari tartiib u socda (tusaale, baaskiil ama gaari muujinaaya calaamada gaabis u socoshada) marka ay amaan tahay in sidaas la sameeyo.



Aaga Baasida ee Wadada Labada Seed, ee Labada Jiho ah

Baasida waa ka mamnuuc marka laynka xariiqda taxan ee jaalaha ah ay ku taalo seedkaaga. Waxaad keliya baasi kartaa marka xariiqda jaalaha ah kala googo'an tahay seedkaaga.



Dhexda Seedka Wadada Labada Seed ee Bidix Loo Leexan karo

Seedka labada jiho ah ee bidix looga leexdo ee ku yaala dhexda wado labo jiho ah, oo seedad badan ayaa keliya loo ogol yahay gaariyaasha u leexanaaya bidix labada jiho midkood. Clamaadaha gaarka ah iyo falaaraha laamiga ayaa la adeegsadaa. Seedkaan looma adeegsado baasid, gelidda wadada, ama ku safridda.



ISGOYSYADA TAREENKA



Calaamada jaalaha ah, ee wareegsan ee digniinta oo leh calaamada "X" xarfah "RR", ama calaamada cad, ee qaabka X leh (isgoyska) oo uu ku qoran yahay qoraalka "Railroad Crossing" ayaa muujinaysa isgoyska wadada wayn iyo wadada tareenka. Isgoysyada qaar waxaa lagu asteeyay nalka fareejada ee tareenka sheegaaya, oo wata ama aan wadan albaab la xiro. Calaamadahaan waxay kuu sheegayaan inaad tartiib u socoto oo u diyaar garoowdo inaad istaagto marka aad aragto ama maqasho tareenka.



Istaag meel ugu yaraan 15 cagood u jirta oo aan ka fogayn 50 fiid tareenka marka uu soo socdo. Sug ilaa inta tareenku baasaayo calaamado kasta oo digniintuna ay istaageen kahor inta aadan baasin wadada tareenka.

Marka isgoyska lagu calaamadiyo keliya calaamadaha marinka ama calaamadaha isgoyska, tartiib u soco oo u diyaar garoow inaad istaagto haddii aad aragto ama maqasho tareen soo socda. Ha istaagin dusha wadada tareenka oo ha iskudayin inaad goyso wadada tareenka marka tareenku soo socdo. Haddii isgoyska lagu calaamadiyo calaamada joogsiga, dhammaan gaariyaashu waa inay istaagaan kahor inta aysan sii socon.


Darawallada gaariyaasha sida rakaabka lacagta baxshay, basaska dugsiga, ama gaariyaasha qaada agabka qaraxyada ama dareereyaasha holci kara, waxaa laga doonayaa inay ka istaagaan markay gaaraan isgoysyada wadada tareenka. Darawaladu waxay ka dhagaystaan albaab iyo daaqad furan, waxay eegaan labada gees si ay u eegaan in tareen soo socdo, iyo calaamado sheegaaya in tareen soo socda, kadibna si taxadar leh ayay u sii socdaan.

QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado

KA ISTAAGIDDA BASKA DUGSIGA – ORC 4511.75

Darawalku wa ainuu u istaago baska dugsiga marka baska dugsigu uu dejinaayo ama qaadaayo ardayda. Marka dirawalka bas iskuul joogsanayo, wuxuu ama waxay shidaa afar laydh oo cambar ah (Jaalle ah) oo dignin ah, laba xaga hore ah iyo laba dhanka danbe ee baska ah. Laydhkan digniinta ah wuu soconayaa ilaa gaadhiga joogsanayo. Baabuurta kale lagama doonaayo inay istaagaan inta nalalka canbarka ah falaash bixinayaan, laakiin waa inay isu diyaariyaan joogsiga isla marka basku istaago.

Marka basku wada istaago, afarta laydh ee cambarka ahi way damaan oo afar laydh oo cas - laba xaga hore ah iyo laba xaga dambe ah - ayaa bilaaba inay in bidhaamaan inta caruurta korayso ma ka dagayso gaadhiga. Intaa waxaa dheer, baska waxaa laga yaabaa in lagu rakibo calaamad joogsi oo leh nalal cas oo biligleynaya oo si toos ah ugu fidsan daaqadda dhinaca bidix ee baska. Haddii aysan jirin calaamad joogsi, weli waxaa lagaa rabaa inaad istaagto.



- Haddii gaadhigu istaago jid ama wado leh wax ka yar afar seed, dhammaan baabuurta baska kaga soo beegan labada dhinac waa inay istaagaan ugu yaraan 10 cagood meel u jirta horta ama gadaasha baska oo ay halkaa joogaan ilaa basku ka dhaqaaqayo ama dirawalka baska uu signal u bixiyo baabuurta kale si ay u dhaqaaqaan.
- Haddii baska lagu joojiyo waddo ama waddo leh afar seed ama ka badan, kaliya taraafikada u socota isla jihadii baska waa inay istaagtaa xagga dambe ee baska oo ay joogsato ilaa basku bilaabo inuu dhaqaaqo.

Darawalada baska dugsiga oo aaminsan in darawal uu si sharci darro ah u dhaafay baska joogsaday, haddii ay suurto gal tahay, waxay u sheegi doonaan lambarka taargada iyo goobta ay ku sugan yihiin hay'adda sharci fulinta, oo isku dayi doonta inay go'aamiso aqoonsiga darawalka.

BADQABKA BASKA DUGSIGA: OGOW GOORTA AY TAHAY IN AAD JOOGSATID



QAYBTA 5: Barashada Sida Gaariga loo Wado

BAARKINKA

Markasta ku baakin aaga loo asteeyay. Baabuurta waa in la baarkin gareeyaa isagoo u jeeda jihada baabuurta dhinaca ka maraysa jidka, barbaryaal wax aan ka badnayn 12 inji ee dhinaca midigta. Jidadka dhinaca kaliya ahi, baabuurta waa in lagu baarkin gareeyaa meel la siman oo aan 12 inji ka fogayn cidhifka wadada. Baarkinka xagasha leh waxaa lagu asteeyaa xariiqyo.



Aagaga Aan Baarkinka Lahayn / Aagaga Dadka Naafada ah

Ka eeg calaamado ama difaacyada la rinjiyeeyay oo mamnuuci kara ama xadidi kara baarkinka. Qaar ka mid ah xannibaadaha baarkinka ayaa lagu muujiyay calaamado midab leh. Ha dhigan meel bannaan oo ay ku calaamadsan tahay calaamada kursiga curyaanka ee loogu talagalay dadka naafada ah, haddii aan lagu siin calaamadda naafanimada ama taargada naafada.



Joogsiga, Baarkinka, ama Istaaga la Madnuucay - ORC 4511.68

Oofna waa in aanu istaagin, gaadhiga dhigin, ama gaadhiga dul istaagin wax kamid meelaha soo socda, marka laga tago marka ay daruuri u noqoto in lagu baajiyo gaadiidka kale in la isku dhaco, ama in loo hogaansamo tilmaamta sarkaal bilays ah ama aaladaha lagu maamulo gaadiidka:



- Geska la maro ee wadada;
- Wadada aag dawladeed ama meel gaar ah horteeda;
- Meel u jirta isgoys ama meelaha lugta lagaga tallaabo 20 cagood;
- Meel 10 cagood uga dhow dab damiska;
- Meel hal fuudh u jirta gaadhi kale oo baarkin garaysan;
- Baabuurka taagan ama la dhigay cidhifka ama qarka waddada; ama
- Meel kasta oo calaamaduhu ay mamnuucayaan in la istaago.

Baaskiil, baaskiil-koronto, moped, mootada (150 cc ama ka yar), ama aaladda isku socodka ee yar ayaa la dhigi karaa laamiga dhinaceeda waase haddii aysan carqaladeyn socodka caadiga ah ee isku socodka dadka lugeynaya.

Ku baakimidda TAAG amar Buur

Haddi ay dhacdo in aad baabuurkaaga dhigato meel buur ah ama meel la sareysa, u leexi taayirrada hore dhanka dariiqa geeskeeda si aad u xasiliso gaadhiga, ka badel geerka "DRIVE" oo geli marshada "PARK", ku taag bareega baarkinka, oo dami matoorka.



QAYBTA 6: Sharciyada iyo Ganaaxyada Gobalka

CAYMISKA – MASUULIYADDA DHAQAALAHA

ORC 4507.212 IYO 4509.101

Gobalka Ohio, waa sharci daro in gaari lagu wado adiga oo aan haysan caymis, waana sharci daro in mulkiilaha gaarigu ogolaado in qof kale uu gaarigiisa wado bilaa caymis. Darawalada ku guuldareysta inay muujiyaan cadeynta ceymiska waxaa laga yaabaa in laga joojiyo shatiga darawalnimada, ganaaxyo iyo qarashka soo celintana laga qaado.

Caddeynta mas'uuliyadda maaliyadeed (caymiska) waa in lagu muujiyaa xaaladahan:

- Mar kasta oo sharci fulinta soo saargo tigidh taraafig ah.
- Isbaarooyinka lagu baaro baabuurta.
- Dhammaan imaanshiyaha maxkamada taraafiga.
- Marka darawalka ama mulkiilaha baabuurku ay ku lug yeeshaan shil wado oo keenay waxyeelada gaariga oo ka badan \$400.

Shuruudaha caymiska qaanta ee ugu yar waa:

- \$25,000 dhaawaca/dhimashada hal qof ah, iyo
- \$50,000 dhaawaca/dhimashada laba qof ama ka badan, iyo
- \$25,000 khasaaraha hantiyeed ee shilka;

AMA

- Dhigista dayn shaqsi ah si loo daboolo qaanta heerka kor lagu sheegay, iyo abuurista hormarinta cadeynta ah ee \$30,000 oo la siinaayo Qasnajiga Gobalka ama gudbinta shahaadada caymiska shaqsiga ah marka aad leedahay wax ka badan 25 gaariyaasha matoorka ku shaqeeya ah.

Darawalada galay dambiyada taraafiga ee halista ah, ururiyay 12 dhibcood ama ka badan muddo laba sano gudahood ah, ama shil geliya baabuur caymis la'aan ah waxaa la waydiin doona inay u keenaan Xafiiska caddaynta inay haystaan caymiska khatar sare.

Markaad baabuurkaaga ka diiwaan geliso Ohio iyo/ama aad codsato ruqsad darawalnimo oo cusub, cusboonaysiin ah, koobi ah, waxaad saxiixi doontaa bayaan dhaarin ah oo ah inaad ku shaqayn doonin baabuur la'aanta caymiska qaanta ama nooc kale oo masuuliyad maaliyadeed oo dhaqangal ah.

KHAMRADA, DAROOGADA, IYO GAARI WADISTA

Kaxaynta gaadhi iyadoo la cabsan yahay khamri iyo/ama daroogo waxay ka soo hor jeedaa sharciga Ohio. Xataa daawooyinka lagu qoray ama laga gadan karo suuqa waxay saamayn karaan awooda gaari wadista ee qofka.

Saamaynada Khamriga iyo Daroogada

Aragga: Waxay keeni kartaa aragga oo xumaada; awoodda diiradda gaabis noqota; iyo hoos u dhaca awoodda lagu qiimeeyo masaafada, xawaaraha, iyo dhaqdhaqaaqa baabuurta kale

Wakhtiga Falcelinta: Waxay gaabis ka dhigaysaa awoodaada fahanka macluumaadka iyo ka jawaabista shaqada gaari wadista

Garashada: Waxay hoos u dhigtaa awoodaada inaad wax ka ogaato agagaarkooda oo aad samayso go'aamo degdeg ah



QAYBTA 6:

- CAYMISKA – MAS'UULIYADDA MAALIYADEED
- KHAMRADA, DAROOGADA, IYO GAARI WADISTA
- CIQAABAADKA
- ISKA LAALAADINTA GEESKA GAARI
- SHARCIYADA SUUMANKA/ BADQABKA RAKAABKA ILMAHA AH



Booqo bogga Hore ee Ohio State Highway Patrol ee [OVI](#) si aad u aragto Tira Koobka Ohio.

QAYBTA 6: Sharciyada iyo Ganaaxyada Gobalka

Khamrada iyo Sharciga

Gobalka Ohio, da'da cabbitaanka khamrada ee sharciga ah waa 21 sano ama ka weyn waana sharci darro in lagu shaqeeyo baabuur adoo dhiigaaga ay ku jirto khamri (BAC) dhan:

- .08% ama ka badan da' kasta
- .04% ama ka badan darawallada gaariyaasha ganacsiga
- .02% ama ka badan marka qofku ka yar yahay 21 sano

Haddii shaqsiga loo joojiyo in looga shakisan yahay in uu gaari wado asagoo cabsan maandooriyaha iyo/ ama khamrada, ama kontoroolka guud ee baabuurka inta uu cabsan yahay, sarkaalku wuxuu sameyn doonaa baaritaanno miyir-qabnimo wuxuuna codsan doonaa baaritaan kiimiko si loo go'aamiyo khamriga iyo/ama maadooyinka daroogada ee ku jira dhiigga. Cadaynta in alkaahool la cabsanaa markii la waday gaadhigu waxay ku salaysan tahay cadaynta oo uu soo ururiyey sarkaalka xadhiga sameeyay iyo natiijada baadhis lagu sameeyay dhiig, carunka dhiiga, ama baaritaanka kaadida.

Baaritaanka Xadka Joojinta Shatiga Maamulka (ALS) — Haddii shakhsigu oggolaado baaritaan kiimiko ah laba saacadood gudahood laga bilaabo xidhitaanka natiijada baaritaankuna ay muujiso BAC .08 ama ka badan, sarkaalka xidhaya wuxuu la wareegayaa shatiga darawalnimada oo wuxuu ogeysiisaa darawalka in shatiga laga joojiyay. Bayaan dhaar ah ayaa loo diraa BMV iyo oo joojinta shatiga ilaa shan sano ayaa isla markiiba bilaabanaysa. Shakhsigu waxa uu xaq u leeyahay in laga qaado baadhis kiimikaad oo madax bannaan oo ay kharashkooda ku bixiyaan.

Diidmada Baaritaanka Joojinta Shatiga Maamulka (ALS) — Haddii shakhsigu diido inuu maro baadhis kiimikaad laba saacadood gudahooda kadib xadhiga, sarkaalka xidhaya wuxuu la wareegayaa shatiga darawalnimada oo wuxuu u diri doonaa qoraal dhaar ah BMV oo caddaynaya diidmada. BMV ayaa markaa looga baahan yahay inay ku soo rogaan hakin muddo hal ilaa shan sano ah, taasoo isla markiiba bilaabanaysa. Joojintu way sii jiri doontaa xataa haddii qofka ugu dambayn lagu soo oogo dacwada OVI (ku shaqaynta gaadhi isagoo naafaysan).

Ku shaqaynta gaadhi ka dib Isticmaalka Khamriga ee Qofka Yar (OVUAC) (Ka yar da'da 21) — OVUAC waxay keeni kartaa hakinta shatiga saddex bilood ilaa laba sano waxayna u baahan tahay darawalka inuu qaato koorsada wadista sixitaanka ah, bixinta kharashka dib u soo celinta shatiga, iyo inuu dib u qaato imtixaanka shatiga darawalnimada Dareewalku waxaa kale oo laga yaabaa in uu ku qaato wakhti xabsiga.

Ganaaxyada Khamriga iyo Daroogada — Dhererka mudada Joojinta Shatiga Maamulka (ALS) waxaa lagu go'aamiyaa tirada diidmadii hore ee baaritaanka ama xukunka la xiriira OVI/daroogo ee lagu xukumay 10kii sano ee ka horaysay:

- ALS — Diidmada Baaritaanka:
 - Diidmada Koobaad – Hakinta ruqsadda muddo hal sano ah
 - Hal Diidmada Hore ah ama Xukunka OVI/Daroogada – Labo sano oo hakinta ruqsadda ah
 - Labo Diidmada Hore ah ama Xukunka OVI/Daroogada – Saddex sano oo hakinta ruqsadda ah
 - Saddex ama in ka badan oo Diidmo hore ah ama OVI/Daroogo lagu xukumay - Shan sano oo laalista ruqsada ah
- ALS — Baaritaanka Ka sara Marista Xadka:
 - Tijaabada koowaad ee ka Badan xadka - Saddex bilood (90 maalmood) oo laalis ruqsada ah
 - Hal xukunka hore ee OVI/Daroogo lagu xukumay ah - Hal sano oo ruqsad laalis ah
 - Labo xukunka hore ee OVI/Daroogo lagu xukumay ah - Labo sano oo ruqsad laalis ah
 - Saddex xukunka hore ee OVI/Daroogo lagu xukumay ah - Saddex sano oo ruqsad laalis ah

Intaa waxaa dheer, haddii shakhsiga lagu xukumay OVI shan jeer ama ka badan 20 sano kahor xadgudubka OVI, isaga ama iyada waxay sidoo kale ku qaadan doonaan wakhti xabsiga; waxaa laga yaabaa in lagu soo rogo xanibaada dhaqdhaqaaqa ama in laga qaado baabuurkiisa; waxaana la gelin doonaa Diiwaanka Dembiilayaasha OVI/OMVI ee Ohio.

QAYBTA 6: Sharciyada iyo Ganaaxyada Gobalka

Daroogada Sarqaanka iyo Gaari Wadista

khamriga ka sokow, daroogooyin kale oo badan ayaa laga yaabaa inay saameeyaan awoodaada inaad si badbaado leh u wadid baabuur. Dhab ahaantii, walax kasta oo marka la geliyo jidhka bini'aadamka wiiqi karta awoodda uu qofku u leeyahay inuu si badbaado leh ugu shaqeeyo baabuur.

Daawooyinka uusan Dhakhtarku Qorin waxa laga yaabaa inay saamayso awoodaada gaari wadista. Hubi calaamadda digniinta ama weydii dhakhtarkaaga/farmashiistahaaga wixii waxyeelo ah oo ka dhalan kara kahor inta aanad qaadan.

Daawooyinka dhakhtar qora sida dawooyinka niyad-jabka, xanuunka yareeya, kaaliyeyaasha hurdada, iyo dawooyinka dejiyaha, waxay saamayn ku leeyihiin baabuur wadista badbaadada leh. Hubi calaamadda digniinta daawada ama weydii dhakhtarkaaga/farmashiistahaaga wixii waxyeelo ah oo ka dhalan kara kahor inta aanad qaadan.

Daawooyinka Sharci-darrada ah waxay saameeyaan falcelinta, xukunka, aragga, iyo feejignaanta oo waa inaan marna la isticmaalin marka baabuur la wado.

Weligaa ha isku darin khamrada iyo daroogooyinka kale ee qofka wiiqa. Daroogadu waxay kordhin kartaa saamaynta khamriga ama waxay yeelan kartaa saameyn dheeraad ah oo iyada u gaar ah.

CIQAABAADKA

Qiimeynta Goobta ee Ruqsadda Darawalka — Darawal kasta oo Ohio oo lagu helo xadgudub taraafiga waxaa lagu qiimayn doonaad dhowr dhibcood oo dambi iyadoo loo eegayo nooca xadgudubka, ama xadgudubyada ku xiga. Tirada dhibcaha ciqaabta ee lagu bixiyo xadgudubyada gaadiidka waxaa lagu qiimeeyaa nidaamka maxkamada.

- Haddii darawalku urursado lix dhibcood muddo laba sano gudahood ah, BMV waxay u diri doontaa warqad digniin ah oo lix dhibcood ah darawalka.
- Haddii darawalku urursado 12 dhibcood ama ka badan muddo laba sano gudahood ah, BMV waxay ku soo rogi doontaa ganaax 12 dhibcood ah ee shatiga darawalnimada. Si dib loogu soo celiyo awooda darawalnimada, shuruudo gaar ah waa in la buuxiyaa, aan ku xaddidnayn, dhammaystirka koorsada gaari wadista sixitaanka ah, xereynta curaarta SR-22 BMV, iyo bixinta ujrada dib u soo celinta ruqsada.
 - SR-22 waa shahaadada mas'uuliyadda maaliyadeed. SR-22 ma aha "nooc" caymis oo dhab ah, laakiin waa foom loo gudbiyay gobolka. Foomkan waxa uu u adeegaa caddayn ahaan in caymiskaaga baabuurku uu buuxinayo caymiska ugu yar ee uu u baahan yahay sharciga gobolku.
- Xadgudubyada Qodobbada:
 - 2 dhibcood - Xadgudubyada dhaqaaqa, dembiyada xawaaraha qaarkood, xad-gudubyada xaddidaadda
 - 4 dhibcood - Tixgelin la'aan ama iska indho tirida badqabka shaqsiga ama hantida.
 - 6 dhibcood - Ku fashilmidda joojinta iyo bixinta aqoonsiga ka dib shil ka mid ah falalka kale ee khatarta ah iyo kuwa halista ah

Laalista Shatiga Tijaabada ah (Da'da Kayar 18) — BMV waxay si toos ah ugu soo rogi doontaa ganaaxa ruqsada darawalada ka yar 18 jir ee ku jira xaaladahan:

- Xukunka, ama qirashada dembiga laba xadgudub oo isu socodka ah, waxay keentaa ka-hakin shati saddex bilood ah oo toos ah;
- Xukunka, ama qirashada dembiga saddex xadgudub oo isku socodka ah, waxay keenaysaa ka joojinta shatiga tooska ah mudo hal sano ah; iyo
- Xukunka, ama qirashada dembiilaha *danbiga Gaari ku Wadista Ruqsad Tijaabo ah adoo cabsan*, waxay keenaysaa laaista ruqsada muddo lix bilood ah.

Shuruudaha dib u soo celinta ruqsada waa in lagu qancaa marka la dhameysto ka joojinta, oo ay ku jiraan helitaanka TIPIC, dhammaystirka barnaamijka hagaajinta darawalnimada da'yarta ee la ansixiyay, iyo ku baarissda imtixaanka gaari wadista.

QAYBTA 6: Sharciyada iyo Ganaaxyada Gobalka

Wadista Gaari adoo Hakin lagu Gashay — Kaxaynta baabuur marka ruqsadaada ay hakin ku jirto waa dambi heer koowaad ah, haddii lagugu helana, waxaa lagaa qaadayaa takhsiiir ilaa \$1,000 ah. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in lagugu xukumo hal sano oo Ruqsadda Darawalka lagaa laalo. Milkiilayaasha baabuurka si bareer ah ugu oggolaaday qof ruqsada laga laalay inuu ku shaqeeyo baabuurkooda waxaa laga yaabaa in lagu xukumo ganaax la mid ah kan darawalka ganaaxa ku jira.

ISKA LAADLAADINTA DHINACA GAADHIGA - ORC 4511.51

Oofna waa in aanu iska laadlaadin ama fuulin dhinaca gaadhi socda. Waa inaan dirawalka gaadhi wayn, ama is-jiidka ah aanu si badheedh ah ugu oggolaan qof ka yar 16 jir inuu fuulo qaybta kaargo ee dusha banana ama aan shiraacnayn ee gaadhiga haddii uu u socdo xawaare ka dheeraynaya 25 mph, haddii arimahan soo socda midkood aanu jirin:

- Qaybta alaabada ee baabuurka uu ku qalabaysan yaahy kursi amaan ah iyo suunka gaadhiga oo waafaqsan halbeega federaalka ee qalabka xajinta.
- Ay jirto xaalad degdeg ah taas oo halis ku ah nololsha dirawalka ama qofka saran buudhiga gaadiga, is-jiidka, ama isjiid yar.
- Rakaabku yihiin shaqaale wadada ka qabanaya shaqada tayarirka wadada wayn ama jidhka ama dhismaha iyagoo awood ka haysta wakaalada dawlada.

SHARCIYADA SUUMANKA/BADQABKA RAKAABKA ILMAHA AH - ORC 4511.81

Sharciga Ohio wuxuu u baahan yahay isticmaalka kursiga badbaadada carruurta ee buuxiya heerarka badbaadada baabuurta ee federaalka. Hubi in si habboon loogu rakibay gaarigaaga oo loo isticmaalo si waafaqsan tilmaamaha soo saaraha. Hubi in **dhammaan carruurta da'doodu tahay 12 iyo ka yar ay si habboon ugu xidhan yihiin kursiga** dambe iyo in kursiga badbaadada carruurta ee gadaal u jeedda aan marna la hor dhigin buufinta aariyada rakaabka oo shaqeynaysa.

Ilmaha kayar 4 jir ee miisaankiisu ka yar yahay 40 bawn — Dhallaanka iyo carruurta ee ka yar 4 jir isla markaana miisaankoodu ka yar yahay 40 rodol waa in si fiican loogu xajiyaa kursiga badbaadada carruurta marka laga wado gaadhiga. Kursiga carruurta ee aad dooranaysaa waa inay ku qoran tahay buuxinta heerarka laga filayo badbaadsanaanta federaalka oo loogu talagalay inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee gaadhigaaga.

Da'da 4 iyo miisaanka 40 rodol laakiin ka yar da'da 8 — Marka ilmo kasta oo da'diisu tahay 4 jir, laakiin ka yar 8, lagu qaado baabuur, wadaha baabuurku waa inuu ilmaha ku xajiyaa si sax ah suunka kursiga ilaa ilmuhu 4-fiit 9-inji oo dherer ah joogo, ama ka dheer.

Da'da 8 laakiin ka yar da'da 15 — Marka ilmo kasta oo ugu yaraan da'diisu tahay 8 laakiin aan ka weynayn 15, lagu qaado gaadhi, wadaha baabuurku waa inuu ilmaha si sax ah ugu xidhaa suunka badbaadada.

Carruurta da'doodu tahay 12 iyo ka yar waa inay fadhiistaan kursiga dambe ee baabuurka si ay uga badbaadaan dhaawac ka yimaada buufinta hawada haddii shil dhaco.

Waxyaabaha laga reebaayo macluumaadka kor ku xusan waxaa ka mid ah baabuurta badbaadada dadweynaha, tagsiilayaasha, iyo baabuurta aanu sharcigu u baahnayn in lagu xidho suumanka badbaadada wakhtiga la soo saarayo.

Akhri buug-gacmeedka mulkiilaha gaarigaaga iyo tilmaamaha xakameynta ilmaha si aad u hesho macluumaad gaar ah oo ku saabsan nidaamka xakameynta ilmaha ee gaarigaaga.

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan badqabka rakaabka ilmaha ah iyo sharciga, ka wac Ohio Department of Health taleefan lambar bilaashka ah, 1-800-755-GROW. Booqo mareegta [Ohio Department of Health](#) si aad u hesho khayraad dheeraad ah.

QAYBTA 7: Xaaladaha Gaari Wadista Gaarka ah

BOOLIISKA IYO ISBAAROYINKA TARAAFIKADA

Maxaa la sameeyaa haddii ay ku joojiyaan sharci fulintu:

- Daar fareejooyinka leexashada oo marka ay nabdoon tahay in sidaas la sameeyo, u soo leexi dhanka midig ee wadada, ama meesha ugu dhow ee nabdoon.
 - Ka dhaqaaji marshada geerka “DRIVE” oo gee geerka “PARK”
 - Dami nalka socodka oo ka dhig “OFF” (ama riix batoonka “STOP”)
- Hoos u dhig daaqadda oo ku jir baabuurka ilaa uu si kale kuu sheego maahee sarkaalku.
- Isdeji oo xidho suunka badbaadada.
- Gacmaha ku hay isteerinka meel uu u jeedo sarkaalka.
- Haddii aad ku haysato hub baabuurka, ogeysii sarkaalka marka ugu horeysa ee aad la hadasho.
- U hoggaansan tilmaamaha sarkaalka.
- Marka la codsado, soo bandhig shatiga darawalnimada, diiwaangelinta gaariga, iyo macluumaadka caymiska.
- La shaqee oo ha la murmin sarkaalka. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, si xushmad leh u weydiiso caddayn.
- Haddii aadan ku raacsanayn tigidhka taraafigga, waxa aad tigidhka kula gorgortami kartaa maxkamadda dhexdeeda.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa muuqaalkaan [“Maxaa la Sameynayaa Haddii lagu joojiyo”](#).

QAYBTA 7:

- BOOLIISKA IYO ISBAAROYINKA TARAAFIKADA
- MARKA AAD ADEEGSATO FAREEJOYINKA HORE
- WADISTA GAARIGA HABAYNKII
- GAARI KU WADISTA CEERYAAMADA
- WADISTA BAABUUR XILIGA QABOBAHA
- AAGAGA SHAQADA

MARKA LA ADEEGSADO NALALKA HORE – OAC 4501-15-01

Nalalku waa inay shidnaadaan:

- Inta u dhaxaysa qorrax-dhaca iyo qorrax-soo-baxa.
- Xili kasta oo roob da'ayo, baraf, ama xaalad cimilo oo kale oo aan haboonayn — iyada oo aan loo eegayn xiliga maalinta.
- Xili kasta oo kale marka laydhka dabiiciga aanay suurtoagal ka dhigayn in la arko waxyaabaha 1,000 cagood kuu jira.
- Mar kasta oo la isticmaalo masaxadaha muraayadaha hore ee ceeryada fuushay awgeed.



WADISTA GAARIGA HABAYNKII

Wadista gaariga habaynkii way ka dhib badan tahay kana halis badan tahay wadista maalintii. Fogaanta aad ku arki karto gaadhigaaga hortiiisa waxaa xadidaya cadadka laydhka ay bixiyaan laydhadhka hore. Si loo ilaaliyo badbaadada markaad baabuur wadid habaynkii:

- Nalalka hore waa inay shidaan inta u dhaxaysa qorrax-dhaca iyo qorrax-soo-baxa.
- Ilaali xawaare taxadar leh oo macquul ah.
- Isticmaal nalalka dhaadheer ee hore mar kasta oo aanay jirin baabuur soo socda. Sharciga Ohio wuxuu kaaga baahan yahay inaad ka yareyso laydhkaaga sare ee laydhadhka hore gaariyaasha hortaada kasoo socda.
- Si aad uga ilaalisoo in aad muddo yar ku cawaranto nalka gaadhiga soo socda, horey u eeg dhanka midig ee wadada.

QAYBTA 7: Xaaladaha Gaari Wadista Gaarka ah

- Mar mar fiiri midig iyo bidix si aad u go'aamiso meesha cidhifka laamiga iyo khataraha ka iman kara dhinacyada.
- Ha xidhan muraayadaha indhaha ama muraayadaha midabka leh marka aad baabuur wadid habeenkii ama maalmaha cimiladu xun tahay. Muraayadaha midabka leh ama leexashada waxay yareeyaan araggaaga.

GAARI KU WADISTA CEERYAAMADA

Barafku waa xaalada ugu halisan ee darawalku ku socon karo. **Tartiib u Soco!**

- La soco socodka taraafikada, laakiin si tartiib ah u wad adoo filanaaya in laga yaabo inaad u baahato inaad istaagto wakhti kasta. Ka fogoow fogaan joogto ah gadaasha baabuurka hortaada socda.
- Isticmaal nalalka hore ee iftiinka hooseeya (ma aha nalalka iftiinka sare) oo sii wad qiimeynta aagga si aad u aragto wixii khatar ah ee iman kara.
- Isha ka milicso halkii aad ka eegi lahayd.
- Haddii aad shil gasho, sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah uga saar gaarigaaga wadada. Haddii gaadhigaagu uusan dhaqaaqi karin, shid fareejooyinkaaga iyo laydhkaaga oo holac shid haddii ay suuragal tahay.



WADISTA BAABUUR XILIGA QABOBAHA

Kaxaynta gaarigu xiliga qaboobaha aad bay uga duwan tahay kaxaynta baabuurka xili kasta oo kale oo sanadka ah. Si kasta oo ay tahayba xaalada wadada ama cimiladu, xawaaraha gaabiska ah ayaa lagama maarmaan u ah in si badbaado leh loogu maareeyo gaadhigaaga, laakiin gaar ahaan waxay muhiim u tahay wadooyinka barafku daboolo ama barafka leh. U dhexaysii masaafo ka weyn tan caadiga ah adiga iyo baabuurta kale, maadaama baabuurta u baahan yihiin joogsi ka weyn sida caadiga ah wadooyinka simbiirixaha ah.

Xusuusnow: Buundooyinka, woodinka isa saaran, iyo meelaha hooska leh ee barafka waddada weyn marka hore! Si khafiif ah u qabashada bareega waxay kaa caawinaysaa in la yareeyo xawliga iyada oo aan la lumin socodka. Haddii gaadhigaagu bilaabo inuu simbado, lugtaadka ka qaad sheelaraha oo leexi isteerinka adigoo u jeeda dhinaca silbashada. Waligaaa bareegga ha qaban marka aad silbato.

AAGAGA SHAQADA

Aagga Shaqadu waa aag ay ka socoto shaqada wadooyinka waxaana laga yaabaa inay gasho haad xidhan, leexashooyin, iyo qalab guuraya. Goobaha shaqadu waa meelo halis u ah shaqaalaha iyo darawallada labadaba. Markaad u dhowaanayso Aagga Shaqada, u fiirso calaamadaha, fuuqyada, fuustooyinka, baabuurta waaweyn, iyo shaqaalaha.

Calaamadaha Aagga Shaqada waxay leeyihiin midab liimi ah iyo xarfo ama calaamado madow. Had iyo jeer yaree xawaarahaaga Aagga Shaqada, xitaa haddii aysan joogin shaqaale. Laamiyada dhuuban iyo laamiyada qalafsan waxay abuuri karaan xaalad khatar ah.



Ohio Department of Transportation waxay bixisaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan badbaadada [Aagga Shaqada](#).

QAYBTA 8: Tilmaamaha Gaari Wadista Badqabka leh

Gaari wadistu waxay u baahan tahay xirfado aad ku kasban karto oo kaliya ku celcelinta iyo khibrada. Qaybta soo socota waxay ku siinaysaa qaar ka mid ah tabaha wadista oo aad ku tababaran karto si ay kaaga caawiyaan inaad noqoto darawal ammaan iyo xirfad badan.

KU RAADINTA EEGMADA

Adiga ayaa mas'uul ka ah ogaanshaha waxa ka dhacaya agagaarka gaarigaaga. Samee qaab wax raadin oo aad isticmaali karto mar kasta oo aad baabuur wado. Raadinta waxay kaa caawinaysaa inaad aragto xaalado keeni kara dhibaato, waxayna ku siinaysaa wakhti aad ku beddesho xawaaraha ama booska wadada.

HORTAADA FIIRI

Hoos u fiirinta wadadaada qorshaysan ee safarka waxay kaa caawinaysaa inaad aragto wadada, isticmaalayaasha kale ee wadada, iyo xaaladaha gaadiidka. Waxa kale oo ay ku siinaysaa wakhti aad ku hagaajiso oo aad ku qorsheyso dhaqdhaqaaqaaga gaari wadista. Sida haboon, isku day inaad eegto waxa ka dhacaya 20 ilaa 30 ilbiriqsi baabuurkaaga hortiisa.

EEG GEESAHA

Ka raadi dhinacyada si aad u hubiso in gaariyaasha kale aysan ka gudbi doonin jidkaaga safarka. Ka eeg garbahaaga xagga dambe si aad u hubiso geesaha aadan u jeedin.

EEG GADAAL

Isticmaal muraayadahaaga si aad u hubiso gaariyaasha kaa dambeeya. Aad bay muhiim u tahay in la hubiyo gaadiidka gadaashiisa ah marka aad beddelayso haadka, hoos u dhigaya ama istaagayo, iyo marka la gelayo isgoyska.

QAYBTA 8:

- KU RAADINTA EEGMADA
- MAAREYNTA XAWAARAHA — KU DABIQIDA XAALADAH WADADA
- MAAREYNTA BOOSKA
- WADA XIRIIRKA
- KAHORTAGA DHAAWACA KA DHASHA GAARIYAASHA KULUL

MAAREYNTA XAWAARAHA — KU DABIQIDA XAALADAH WADADA

Wadista si badbaado leh macneheedu waa in xawaaraha gaadhiga lagu hagaajiyo xaaladaha wadada iyo taraafikada, iyadoo la siinayo badka u dhexeeya oo ku filan iyo addeecida xaddidaada xawaaraha ku haboon.

Leexyada wadada — Kahor intaadan galin qalooqa, ku dhin xawaaraha si xawli badbaado leh kaas oo kuu ogolaanaya inaad ku wado sheelare yar oo joogto ah inta aad marayso qalooqa. Xawaaraha sii yaree marka jiididdu xumaato, marka aad dabo galayso baabuurta kale, iyo marka aanad arki karin dhamaadka qalooqa.



Wadooyinka Sibibaxa ah — Iska yaree xawaaraha marka aad aragto calaamada ugu horeysa ee roobka, barafka, dhadada, ama barafka. Marka uu jidku simbiirixayo yahay, taayaradaada sidoo kale ma xajisanayaan. Waxay qaadan doontaa waqti dheer in la joojiyo, wayna adkaan doontaa in la leexiyo iyada oo aan bariiqan. Haddii gaarigaagu bilaabo inuu simbiiraxoodo, si tartiib ah cagtaada uga fuqaad sheelaraaha gaaska oo si tartiib ah ugu qabo bareega. Had iyo jeer yaree xawaarahaaga oo oggolow masaafu dheeraad ah oo u dhaxaysa adiga iyo baabuurka kaa horreeya haddii jidku qoyan yahay ama uu qariyey baraf ama ceeyaamo.



Ku sibqashada Qoyaanka — Ku sibqashada Qoyaanka waxay dhacdaa marka taayirrada isteerinka bilaabaan inay kor fuulaan biyaha uruuray, oo la mid ah falka biyo ku wadista saxiimada. Sida ugu fiican ee looga hortagi karo luminta biyo-mareenada waa in la dhimo xawaaraha marka gaari lagu wado roobka iyo marka wadada ay biyo fadhiyaan. Marka taayirku biyaha jiiraayo, si tartiib ah uga qaad cagtaada sheelaraaha.

Wadooyinka Daadku Qaaday — Haku wadin gaariga balida waawayn ee biyaha fadhiistay wadada. Haddii aad aragto waddo daad qaaday, raadso waddo kale oo aad ku tagto meeshaad u socoto.



QAYBTA 8: Tilmaamaha Gaari Wadista Badqabka leh

MAAREYNTA BOOSKA

Waxaad jidka la wadaagi doontaa noocyo kala duwan oo kale oo isticmaalayaasha waddooyinka ah. "Aaga meel bannaan" waa masaafada bannaan ee aad u oggolaato inta u dhexeysa gaarigaaga iyo isticmaaleyaasha kale ee waddooyinka — taasoo ku siinaysa wakhti aad kaga falceliso. Had iyo jeer isku day inaad ilaaliso masaafada badbaado leh oo idiin dhaxaysa adiga iyo gaariyaasha kale.

Masaafada Joogsiga = Masaafada kala Fogaanta

Masaafada joogsiga waa masaafada uu baabuurkaagu ku socdo, xaaladaha ugu fiican, laga bilaabo wakhtiga aad xaqiiqsatay inay tahay inaad istaagto ilaa marka gaadhigaagu istaago. Waxyaabo dhowr ah ayaa laga yaabaa inay saameeyaan masaafadaada joogsiga:

Xawaaraha - Waa xawaaraha aad ku safrayso. Hadba sida ugu dhakhsaha badan ee aad u socoto, ayaa wakhti badan iyo masaafada loo baahan yahay si loo joogsado.

Waqtiga Fahamka - Waqtiga iyo masaafada ay kugu qaadaneyso inaad garato baahida joojinta. Celceliska wakhtiga aragtida dirawalka ee digniinta waa $\frac{3}{4}$ ilbiriqsi ilaa 1 ilbiriqsi.

Waqtiga Falcelinta - Waqtiga iyo masaafada ay kugu qaadanayso inaad ka falceliso oo aad cagtaada ka dhaqaajiso sheeraha gaaska, oo aad bilawdo inaad bareega qabato. Darawalka caadiga ah waxa uu leeyahay waqtiga falcelinta ee $\frac{3}{4}$ ilbiriqsi ilaa 1 ilbiriqsi.

Masaafada Bareeg Qabashada - Waqtiga iyo masaafada ay qaadanayso in bareegaago gaabiyo oo uu istaajiyo gaadhiga. Marka lagu socdo 50 mph laami qalalan oo leh biriig fiican, waxay qaadan kartaa ilaa 158 cagood in la joogsado.

Masaafada horta gaariga

Had iyo jeer isku day *inaad joogteyso* ugu yaraan fogaanta dheerarka hal baabuur 10 mayl kasta saacaddii safarka, ama afar ilbiriqsi inta u dhaxaysa gaarigaaga iyo baabuurka kaa horeeya.

Go'aami masaafada afar-ilbiriqsi ee kaa horeysa:

- Marka gadaasha baabuurka kaa horeeya ay dhaafto meel taagan, sida calaamad ama tiir, bilow tirinta ilbiriqsiyada ay kugu qaadanayso inaad gaadho isla bartaa taagan - "kun-iyo-kow, kun-iyo-labo, kun-iyo-saddex, kun-iyo-afar.
- Aad ayaad uga dabo dhowdahay haddii aad ka gudubto barta taagan kahor intaadan tirin afar ilbiriqsi.
- Iska yaree xawaaraha ka dibna ku tiri mar kale meel kale oo taagan si aad u hubiso masaafada cusub ee soo dabo socoto. Ku celi ilaa aad ku raacayso ugu yaraan afar ilbiriqsi.
- Tababarka kadib, qiyaas inta ilbiriqsi ee aad ka fog tahay shay ka baddina tiri ilbiriqsiyada ay qaadanayso si aad u gaadho shayga si aad u aragto heerka aad saxan tahay.

Waxaa jira xaalado gaar ah markaas oo masaafada dheeraad ah oo ka horaysa gaadhigaaga loo baahdo. Kordhi masaafadaada dabagalka marka:

- Aragtida waxaa yareeya ama xaddida cimilada (ceeryaan, roob, baraf, iwm.), ama habeenkii.
- Waddooyinka sibiqa ah.
- Dabo raacidda baabuurta waaweyn sida kuwa xamuulka qaada, basaska, baabuurta madadaalada, iyo baabuurta isjiidka ah.
- Daba raacidda baabuurta looga baahan yahay inay ku joogsadaan isgoysyada tareenada, sida basaska, ama baabuurta sida walxaha halista ah.

QAYBTA 8: Tilmaamaha Gaari Wadista Badqabka leh

Booska Ka Banaan Geeska

Aaga bannaan ee dhinacyada baabuurkaagu waxay yaraynaysaa halista shilka iyadoo leh ikhtiyaarka aad u dhaqaaqi karto midig ama bidix.

- Ka fogow inaad ku ag wadid baabuurta kale wakhti dheer. Waxaa laga yaabaa inaad ku jirto aaga darawalku uusan u jeedin, waxayna yaraynaysaa booska aad u baahan karto si aad uga fogaato shil.
- Ka fogow inaad ciriiri geliso calaamadaynta laynka dhexe. Isku day in aad haysatid booska ugu badan ee suurtoogalka ah inta u dhaxaysa adiga iyo gaadiidka soo socda.
- Meel bannaan sii baabuurta gelaya waddo dhawr haad ah ama xaddidan adigoo ku wareegaya haad ama badelaaya xawaarahaaga.
- Sii boos dheeri ah dadka lugeynaya, gaar ahaan carruurta, iyo baaskiilleyda.
- Marka gaariga ku dhaafaya uu yahay isjiidka cagafta, banee yar oo dheeri ah adoo u dhaqaaqaya qaybta ka baxsan seedkaaga, oo ka fogaanaaya isjiidka inta uu ku dhaafaayo.

Masaafada gadaale

Had iyo jeer ma fududa in aad ilaaliso masafo badbaado leh oo ka dambaysa gaadhigaaga. Si kastaba ha ahaatee, waxaad ku caawin kartaa in darawalka kaa dambeeyaa uu ku joogo masafo badbaado leh adiga oo xawaaraha joogteynaaya, xili hore u fareejaynaaya, oo boos badan ku haynaya dhinaca hore ee gaadhigaaga kahor intaadan xawaaraha yarayn ama leexan.

WADA XIRIIRKA

Ogeysiinta Dadka Kale Inaad Goobta Joogto

Waa mas'uuliyaddaada inaad ka dhigto gaarigaaga mid ay arki karaan isticmaaleyaasha kale ee waddooyinka.

Adeegso Nalalka hore — Sharciga Ohio ayaa ka doonaaya nalalka hore inay shidnaadaan qorax dhac ilaa qorax soo bax, markasta oo aan si fiican wax loo arkayn (roob, baraf, ceeryaamo, iwm.), iyo markasta oo gacannada masaxaada muraayada hore la adeegsanaayo sabab la xiriirta roobka. Nalalka hore ee iftiinka badan ayaa la adeegsan karaa markasta oo nalalka hore la adeegsanaayo marka laga reebo marka gaari kale hortaada kasoo socdo.



Isticmaal Hoonkaaga — Hoonka gaadhiga, marka si sax ah loo isticmaalo, waxa loo isticmaali karaa in lagu soo jeediyo dareenka isticmaalayaasha waddooyinka. Si fudud u taabo hoonkaaga si aad ula xiriirto dadka kale marka:

- Dadka lugaynaya ama baaskiil wadayaasha ay u muuqdaan inay ku sii socdaan haadkaaga safarka.
- Marka aad garab marayso darawal bilaabay inuu u leexdo seedkaaga.
- Darawalku aan ka warqabin ama laga yaabo inay dhib ku noqoto inuu ku arko.



Aanad Isticmaalayn Hoonkaaga - Kaliya isticmaal hoonkaaga marka aad u baahan tahay inaad la xidhiidho isticmaalayaasha kale ee wadada. Isticmaalka hoonkaaga si aan habboonayn waxay cabsi galin kartaa ama ka cadhaysiin kartaa isticmaale kale ee wadada.

Tilaamida Dhaqdhaqaaqaaga

Fareejo bixi ka hor inta aadan Beddelan Jihada — Digniin ku haboon ayaa siinaysa isticmaalayaasha kale ee waddooyinka wakhti ay kaga falceliyaan dhaq-dhaqaaqa gaarigaaga. Isticmaal fareejada leexashada markaad bedelayso seedka, markaad soo gasho wadada, ama markaad bidix ama midig u leexanayso. Fareejo ku muuji leexashada ugu yaraan 100 cagood ka hor leexashada. Hubi in aad joojiso fareejadaada si aad iskaga ilaaliso jahawareerinta darawaliinta kale.

Calaamadaha Marka Xawaaraha la dhimayo — Nalalka bareega waxay u u sheegayaan isticmaalayaasha kale ee wadada in baabuurka uu gaabinayo ama istaagayo. Isticmaal fareejada leexashada ka hor inta aadan dhimin xawaaraha marka:

- Aad ka leexanayso waddo aan lahayn jidad leexsan ama seedka bixitaan gaar ah.
- Baakimayso ama leexanayso ka hor isgoyska.

QAYBTA 8: Tilmaamaha Gaari Wadista Badqabka leh

KAHORTAGA DHAAWACA KA DHASHA GAARIYAASHA KULUL

Carruurta

Qiyaastii 38 caruur ah ayaa sanad walba Maraykanka ugu dhinta kulaylka baabuurka, sida lagu sheegay KidsAndCars.org iyo NoHeatStroke.org.

Kormeerka – Marna ilmaha keligood ha uga tagin gudaha, ama agagaarka gaariyaasaha!

Fiiri inta aanad Xidhin – caado ka dhig inaad eegto kursiga dambe kahor inta aanad xidhin albaabada. (Look Before You Lock™ waa ol-ole ay wado KidsandCars.org™)



Xasuusino – Samee xusuusin si aad u hubiso kursiga dambe. Xasuusinada waxaa kamid ah:

- Ku dhaaf alaabta aad u baahan doonto kursiga dambe, sida shandadaada, boorso gaaban, taleefanka gacanta, aqoonsiga shaqaalaha, iwm.
- Ku hayso xayawaan boonbalaha kursiga hore ee rakaabka si aad u abuurto xusuusin muuqaal ah.


Deji "Siyaaaasada Dejinta" – Weydii bixiyaha xanaanada ilmaha inuu kula soo xiriiro haddii ilmahaagu u iman waayo sidii loo qorsheeyay.

Gaadhigaaga Xidh – Abuur caado ah inaad had iyo jeer xidhid albaabbada iyo qaybta danbe baabuurkaaga, sanadka oo dhan. Weydii bixiyaha xanaanada ilmahaaga, asxaabta, iyo deriskaaga inay sidaas oo kale sameeyaan.

Ilmo Maqan – Haddii ilmo la waayo, hubi qaybaha rakaabka ee baabuurka iyo qaybta danbe dhammaan baabuurta aagga, xitaa haddii ay xiran yihiin. Ilmaha waxa laga yaabaa inuu albaabada xidho kadib marka uu galo.

Talaabo Qaad! – Haddii aad aragto ilmo kaligiis baabuurka saaran:

- Isla markiiba wac 911. Hubi albaabada furan oo isku day inaad hesho waalidka inta aad wacayso.
- Haddii ilmuhu uu dhib ku jiro ama uu jawaabi waayo, qaado tillaabo aad ilmaha kaga saareyso gaariga. Jebi daaqaad haddii loo baahdo. Gobolo badan, oo ay ku jirto Ohio, waxay leeyihiin sharciyada "Samafale Wanaagsan" oo dadka ka ilaaliya dacwooyinka ka dib markay ka jawaabaan xaalad degdeg ah.
- La joog ilmaha ilaa caawimo laga helayo.



Xayawaanka raabayada ah

Xusuusnow "saaxiibadaada shactirada badan" sidoo kale, hana ku dhaafin gaarigaaga. Xataa iyadoo daaqaduhu jaban yihiin, heerkulka baabuurku wuxuu kordhi karaa 20 darajo (Fahrenheit) 10 daqiiqo gudahood.



QAYBTA 9: Wadaagista Wadada

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay waddada Xusuusnow inaad noqoto qof akhlaaq leh oo sheeg joogitaankaaga iyo ujeedooyinkaaga si aad isaga ilaaliso shilalka.

DADKA LUGAYNAAYA

Dadka lugeynaya way adkaan kartaa in la arko waxaana laga yaabaa inay adag tahay in la go'aamiyo waxa ay damacsan yihiin. Dadka lugeynaya had iyo jeer ma adeecan calaamadaha taraafigga ama ma socdaan isgoysyada calaamadeysan, marka darawal ahaan, waa inaad u hoggaansanaataa dadka lugeynaya.




Didniin:

- Dadka lugeynaya ee aragga naafada ka ah ama indho la' (sita bakoord cad ama isticmaalaya ey hage ah) waxay leeyihiin xaq ay wadada ku maraan.
- U banee dadka lugeynaya marka aad leexanayso.
- Ka digtoonow aagaga dadka lugeynaya ee u dhow baabuurta baakimanama taagan.
- Raadi dadka lugeynaya iyo walxaha kale ka hor inta aadan dib u bixin.
- Ka digtoonow aagaga garoommada lagu ciyaaro iyo meelaha la deggan yahay. U diyaargarow inaad si degdeg ah u joogsato.
